



DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA XISAABIYAHHA GUUD EE DAWLADDA

WARBIXIN MAALIYADEEDKA SADDEX
BILOODLAHA AFARAAD EE OCTOBER -
DECEMBER 2024

FEB 2025

WARBIXIN MAALIYADEEDKA

Saddex biloodlaha Afaraad 1^{da} October – 31^{da} December 2024

Waxaa soo saaray warbixintaan

XAFIISKA XIISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAA WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

Liiska Shaxaha

Shaxda 1 ^{aad} : Miisaaniyadda iyo Dhabta Dakhliga Dawladda Jan-Dec 2024	4
Shaxda 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Oct-Dec, 2020-2024.....	4
Shaxda 3 ^{aad} : Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha Oct-Dec, 2020-2024	6
Shaxda 4 ^{aad} : Qaybaha Dakhliga Canshuraha Oct-Dec, 2020-2024	8
Shaxda 5 ^{aad} : Dakhliyada Kale Oct-Dec, 2020-2024	9
Shaxda 6 ^{aad} : Deeqaha Dibadda Oct-Dec, 2020-2024	9
Shaxda 7 ^{aad} : Deeq labo dhinacle ah Oct-Dec, 2020-2024	9
Shaxda 8 ^{aad} : Deeqda Dhinacyada Badan Oct-Dec, 2020-2024.....	10
Shaxda 9 ^{aad} : Deeqaha Kabka Vs Deeqaha Mashaariicda	10
Shaxda 10 ^{aad} : Dakhliga Gudaha Vs Kharashaadka Dawladda Oct-Dec, 2020-2024.....	10
Shaxda 11 ^{aad} : Daymaha Dawladda.....	11
Shaxda 12 ^{aad} : Fulinta Miisaaniyadda Sannadka 2024	12
Shaxda 13 ^{aad} : Fulinta Miisaaniyadda Sannadka 2024 - Hay'adaha Dawladda	12
Shaxda 14 ^{aad} : Dhabta Kharashaadka Hay'adaha Oct-Dec, 2020-2024.....	12
Shaxda 15 ^{aad} : Noocyada Kharashaadka Oct-Dec, 2020-2024	13
Shaxda 16 ^{aad} : Mushaaraadka Shaqaalaha Oct-Dec, 2020-2024.....	14
Shaxda 17 ^{aad} : Mushaaraadka Hay'adaha Amnig Vs Hay'adaha kale	15
Shaxda 18 ^{aad} : Isticmaalka Agabka iyo Adeega Oct-Dec, 2020-2024	16
Shaxda 19 ^{aad} : Dulsaarka Daymaha Oct-Dec, 2020-2024	18
Shaxda 20 ^{aad} : Kabka Oct-Dec, 2020-2024	18
Shaxda 21 ^{aad} : Deeqaha Oct-Dec, 2020-2024.....	19
Shaxda 22 ^{aad} : Kharashaadka Dawlad Goboleedyada Oct-Dec, 2020-2024.....	19
Shaxda 23 ^{aad} : Faa'idada Bulshada Oct-Dec, 2020-2024	20
Shaxda 24 ^{aad} : Hantida aan Maaliyadda ahayn Oct-Dec, 2020-2024	20
Shaxda 25 ^{aad} : Dib u bixinta Daymaha Oct-Dec, 2020-2024.....	20

Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1 ^{aad} : Saamiga Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda	5
Jaantuska 2 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Oct-Dec, 2020-2024	5
Jaantuska 3 ^{aad} : Qaybaha Dakhliga Gudaha Oct-Dec, 2020-2024.....	6
Jaantuska 4 ^{aad} : Saamiga Canshuuraha & Dakhliyada Kale	6
Jaantuska 5 ^{aa} : Dakhliga Gudaha ee Bille aha Jan-Dec, 2020-2024.....	7
Jaantuska 6 ^{aad} : Isbadalka Dakhliga Gudaha Jan-Dec 2020-2024	7
Jaantuska 7 ^{aad} : Dhabta Dakhliga Canshuurta Oct-Dec, 2020-2024	8
Jaantuska 8 ^{aad} : Kharashaadka Hay'adaha Oct-Dec, 2020-2024	13
Jaantuska 9 ^{aad} : Kharashka Bille ah Jan-Dec, 2020-2024.....	14
Jaantuska 10 ^{aad} : Boqolayda Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale	15
Jaantuska 11 ^{aad} : Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale	15
Jaantuska 12 ^{aad} : Kharashaadka Hawl-fulinta.....	17
Jaantuska 13 ^{aad} : Kharashaadka Safarka & Shirarka	17
Jaantuska 14 ^{aad} : Kharashaadka Kirooyinka.....	17
Jaantuska 15 ^{aad} : Kharashaadka kale ee Hawl-fulinta.....	17
Jaantuska 16 ^{aad} : Hawlgalda Ciidamada.....	18
Jaantuska 17 ^{aad} : Kharashaadka Guud ee kale	18

TUSMADA WARBIXINTA

Liiska Shaxaha	iii
Liiska Jaantusyada	iii
CADDAYNTA WAAJIBAADKA	1
1.0 FAALO GUUD	2
2.0 DULMAR GUUD IYO FALANQAYN EE XISAABXIRKA JAN-DEC 2024.....	4
2.1 DHABTA DAKHLIGA DAWLADDA Oct – Dec 2020 - 2024	4
2.1.0 DAKHIGA GUDAHA.....	6
2.2.0 Deeqaha Dibadda	9
3.0 MIISAANIYADDA IYO DHABTA KHARASHAADKA EE SANNADKA 2024.....	12
3.1 DHABTA KHARASHAADKA DAWLADDA OCT-DEC, 2020-2024	12
3.2 Noocyada Kharashaadka.....	13
4.0 MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA.....	21
5.0 MUUQAALKA ISBARBARDHIGGA SAADAASHA MIISAANIYADDA IYO NATIJADA DHABTA AH	22
7.0 ISTICMAALKA MIISANIYADDA EE HAY'ADAHA DAWLADDA	23
8.0 MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DAWLADDA	25
9 FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAABXIRKA.....	33


CADDAYNTA WAAJIBAADKA

Warbixinta maaliyadeed oo ka bilaabanayso bogga 4^{aad} kuna eg bogga 41^{aad} waxaa loo soo diyaariyay hab waafaqsan sharciga iyo xeernidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 (PFM Act-2019). Sidoo kale, si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Qodobka 44^{aad} faqradiisa 2^{aad} ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud waxa uu farayaa: "Sarkaalka Idman kasta ee hay'adaha Dawladda waa in uu warbixin saddex biloodle ah usoo gudbiyaa Xisaabiyaha Guud xisaabaadka hay'adaha Dawladda". Waxa sidoo kale uu qodobka 43^{aad} faqradiisa 1^{aad} farayaa Xisaabiyaha Guud ee Dawladda in uu wargeliyo dhammaan hay'adaha Dawladda, Dawladaha hoose iyo Shirkadaha Dawladdu leedahay nidaam xisaabeedka laga doonayo in ay dhaqangliyaan. Si waafaqsan qodobka kor ku xusan, Xisaabiyaha Guud ee Dawladda waxa uu qaatay nidaam xisaabeedyada caalamiga ah ee la isla aqoonsanyahay gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) marka uu diyaarinaayo xisaabxirka Dawladda.

Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxa uu markasta soo diyaariyaa xisaabxirka Dawladda, isagoo ku soo bandhiga dhammaan macluumaadka iyo faahfaahinnada lagama maarmaanka u ah, fahanka caddaymaha maaliyadeed ee koobaya dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee Dawladda. Hadaba, waxaan halkan ka caddaynayaa in dhammaan xisaabaadka ku qoran warbixinnada maaliyadeed ay waafaqsanyihiin xisaabaadka ku qoran buugaagta iyo diiwaanka maaliyadeed ee Dawladda.

Waxaan sidoo kale qirayaa in xisaabxirka Dawladda Federaalka Soomaaliya ee sannad maaliyadeedka rubaciisa afaraad ee ku dhammaaday 31^{ka} December 2024 loo soo diyaariyay si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2022 iyo sidoo kale Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).


Abdirahman Mohamed Anas
Xisaabiyaha Guud ee Dawladda



1.0 FAALO GUUD

1.1 DULMARKA GUUD EE XISAABXIRKA

Xisaabxirka iyo warbixin maaliyadeedka la socda waxaa had iyo jeer lagu soo gudbiyaa hawlqabadka Dawladda ee dhinaca maaliyadda ee sannad kasta. Sidaas darteed, warbixintani waxa ay khusayaa hawlqabadka Dawladda ee sannad maaliyadeedka rubaciisa afaraad ee ku dhammaaday 31^{ka} December 2024 sida ku cad muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka. Sidaas si la mid ah, warbixin maaliyadeedkani waxa uu akhristaha u siinayaa fursad in uu si kooban u helo sida ay u dheceen dhammaan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee ay dawladdu fulisay iyo muuqaalka maaliyadeed ee Dawladda ee dhammaadka rubaca 4^{aad} sannad maaliyadeedka 2024. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda ayaa isu keenay warbixin maaliyadeedka guud ahaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawlada kaddibna soo saaray warbixintaan.

Xisaabxirka rubaciisa 4^{aad} sannad maaliyadeedka 2024, waxaa lagu soo gudbiyey oo lagu soo koobay kaliya dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda kuna jira miisaaniyadda guud ee Dawladda ee sannadka 2024 kaasoo horay u ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya. Sidaas darteed, iyada oo la eegayo qodobka 1.4.8 ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), xisaabxirkani waxaa uu khuseeyaa kaliya warbixinta dakhliga iyo kharashaadka ku jiray qiyaasta Miisaaniyadda Dawladda ee sannad maaliyadeedka 2024. Sidoo kale waxa aanan ku jirin oo aan warbixintan lagu soo darin Dakhliga iyo kharashaadka aan ku jirin miisaaniyadda 2024 ee ay isticmaaleen Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda intii lagu guda jiray isla rubaca 4^{aad} sannad maaliyadeedka kor ku xusan.

Guud ahaan, saadaasha miisaaniyadda iyo warbixinta dhabta dakhliga ee soo galay Dawladda iyo sidoo kale kharashaadka sida dhabta ah ugu baxay hawlaha Dawladda, waxaana loo soo bandhigaa sidii ay ugu suurto galin lahayd Dawladda Federaalka Soomaaliya in ay qaadata go'aanada muhiimka u ah horumarinta danaha dhaqaale iyo guud ahaan istiraatiijiyadaha fog ee qaranka iyo danaha iyo istiraatiijiyadaha qaranka ee muhiimka u ah horumarka dhaqaale ee dalka.

Hay'adaha Dawladda ee ku jiray qoondada Miisaaniyadda Dawladda ee laga diyaariyay warbixintaan ka eeg faahfaahin tirsinkeedu yahay 8.1.1 (c).

1.2 Qaabka iyo Muuqaalada ay ka Kooban tahay Xisaabxirka

Warbixinta xisaabxirkan waxaa loo soo diyaariyay iyada oo la raacayo Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017). Guud ahaan xisaabaadka Dawladda waxaa lagu maamulay laguna saleeyey hab-xisaabeedka lacagta caddaanka ah ee faraya in la aqoonsado dhaqdhaqaaqa maaliyadeed keliya markii si dhab ah lacagta loo helo ama loo bixiyo.

Hadaba, xisaabxirkani waxaa loo soo gudbiyay sida ku cad qaybta 1^{aad} ee isla Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), taasoo waajibinaysa in macluumaadka soo socda la shaaciyo.

1.2.1 Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka

Sida uu qabo Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) gaar ahaan faqradaha kala ah 1.3.12 iyo 1.3.13, muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka waa in lagu soo gudbiyaa wadarta dakhliga soo galay iyo kharashaadkii ka baxay Dawladda. Sidoo kale, waxaa lagu soo bandhigaa farqiga

u dhexeeya dakhliga iyo kharashaadka sannadka, si loo muujiyo haraaga ku soo haray (Dheeri/(Dhiman) Khasnada Dawladda. Waxaa kale oo lagu soo bandhigaa ilaha dakhliga ka soo galo Dawladda iyo meelaha lagu bixiyo.

1.2.2 Muuqaalka Isbarbardhigga Ku talagalka Miisaaniyadda iyo Dhabta

Warbixintaan waxaa la isku barbardhigaa, kutalagalka qiyaasta dakhliga miisaaniyadda Dawladda iyo dakhliga loo helay. Waxa ay iftiimaysaa inta uu le'eg yahay dakhliga soo galay Dawladda iyo sida loo kharash gareeyay si waafaqsan xeerka miisaaniyadda uu ogolaaday Golaha Baarlamaanku in loo isticmaalo dakhliga Dawladda.

1.2.3 Xeerarka Xisaabeed

Waa xeerarka, axdiyada, mabaadi'da, shuruucda u gaarka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya lana dhaqan galiyey intii lagu guda jiray diyaarinta iyo soo gudbinta Xisaabxirka Dawladda.

1.2.4 Faahfaahinada iyo Sharaxaada Xisaabxirka

Faahfaahinnada la socda xisaabxirka waxa ay ka caawinayaan akhristaha in si qoto dheer loo fahmo macluumaadka ku xusan Xisaabxirka. Sidoo kale waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin Xisaabxirka.

1.2.5 Faahfaahino Dheeri ah

Qaybtan waxaa lagu soo bandhigaa qayb ka mid ah xeerarka xisaabeed iyo faahfaahino kale oo sharaxaad dheeri ah bixinaya. Waxaa kale oo laga heli karaa caddaynta in la dhaqan galiyay shuruudaha ku xusan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Halkan hoose waxaa ku xusan warbixinada laga heli karo macluumaad dheeri ah oo loo baahanyahay in la faafiyo si kor loogu qaado heerka isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka maaliyadda dawladda.

2.0 DULMAR GUUD IYO FALANQAYN EE XISAABXIRKA JAN-DEC 2024

Faah-faahin	Miisaaniyadda Sannadka	Dhabta Jan-Mar	Dhabta Apr-Jun	Dhabta Jul-Sep	Dhabta Oct-Dec	Wadarta Jan-Dec	% Fulinta
Wadarta Dakhliga Gudaha	346,217,146	91,713,350	89,348,202	86,586,751	101,705,488	369,353,791	107%
Dakhliga Canshuuraha	241,427,153	65,767,125	62,729,824	62,524,073	75,742,894	266,763,916	110%
Dakhliyada Kale	104,789,993	25,946,225	26,618,377	24,062,678	25,962,594	102,589,875	98%
Deeqaha Dibada	694,623,255	26,698,352	166,357,263	174,855,938	175,450,374	543,361,927	78%
Deeqaha Laba dhinac	68,121,168	5,641,619	11,001,990	10,286,261	2,768,685	29,698,555	44%
Deeqaha Dhinacyada Badan	626,502,087	21,056,733	155,355,273	164,569,677	172,681,689	513,663,372	82%
Hantida la libinaayo	33,518	-	-	-	-	-	-
Hantida ma guurtada ah	33,518						
Wadarta Dakhliga	\$1,040,806,883	\$118,411,702	\$255,705,465	\$261,442,689	\$277,155,862	\$912,715,718	88%

Shaxda 1^{aad}: Miisaaniyadda iyo Dhabta Dakhliga Dawladda Jan-Dec 2024

Sida ka muuqata shaxda 1^{aad}, waxaa la helay dakhli dhan 913M oo u dhiganta in la helay **88%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyadda sannadka 2024. Dakhliga Gudaha waxaa la helay **369M** oo u dhiganta **107%** miisaaniyada sannadka, halka deeqaha dibadda la helay **543M** oo u dhiganta **78%** marka loo fiiriyo odoroskii deeqaha dibadda ee Miisaaniyad sannadeedka 2024.

Dakhliga Gudaha waxaa la helay 7% ka badan odoroska miisaaniyadda sannadka 2024. Dakhliga canshuuraha la helay 10% ka badan qiyaas sannadeedka miisaaniyadda sannadka. Deeqaha dibadda ayaa la helay dakhli ka hooseeye 22% qiyaas sannadeedka miisaaniyadda sannadka.

Dhabta wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Oct-Dec ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 17% wadarta dakhlig gudaha ee lahelay Jul-Sep ee sannadka 2024. Sidoo kale wadarta dakhliga gudaha ee la helay bilaha July-Sep wuxuu ka yar yahay 3% wadarta dakhliga gudaha ee lahelay bilaha Apr-Jun ee sannadka 2024.

Marka la is barbardhigo wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bilaha Jan-Dec 2024 ayaa ahaa \$913M, wuxuuna ka badan yahay 24% wadarta dakhliga la helay; oo ahaa \$738M; bilaha Jan-Dec ee sannadka 2023. Sidoo kale Wadarta Dakhliga Gudaha ee la helay Jan-Dec 2024 ayaa ahaa \$369M, wuxuuna ka badan yahay 12% wadarta dakhliga gudaha ee la helay \$329M bilaha Jan-Dec sannadka 2023, halka deeqaha dibadda kordheen 33% bilaha Jan-Dec ee sannadka 2024 marka la barbardhigo deeqadii la helay Jan-Dec 2023.


2.1 DHABTA DAKHLIGA DAWLADDA Oct – Dec 2020 - 2024

Faah-faahin	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dakhliga Gudaha	58,614,923	66,749,272	90,757,893	97,120,381	101,705,488
Deeqaha Dibadda	92,101,388	37,569,356	177,552,722	208,685,692	175,450,374
Wadarta Dakhliga Dawladda	150,716,311	104,318,628	268,310,615	305,806,073	277,155,862
Daymaha/Horumaris	0	43,054,944	-	-	-
Iibinta Hantida	0	0	-	-	-
Wadarta Maaligelinta	\$ 0	\$ 43,054,944		-	-
Wadarta Guud	\$ 150,716,311	\$ 147,373,572	\$268,310,615	\$ 305,806,073	\$277,155,862


Shaxda 2^{aad}: Dhabta Dakhliga Oct-Dec, 2020-2024

Wadarta dakhliga Dawladda ee la helay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 ayaa ahaa **277M**, wuxuuna ka yar yahay **9.4%** dakhligii la helay rubaca afaraad ee sannadka 2023. Sida ka muuqato shaxda 2^{aad} ee isbarbardhiga dakhliga Dawladda saddex biloodlaha afaraad ee sanadaha 2020 ilaa 2024, kororkii ugu badnaa wuxuu sameeyey sannadka 2022, waxaana la helay dakhli ka badan 36% wadarta dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadkii 2021.

Dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 ayaa ahaa 102M, wuxuuna ka badan yahay 5% wadarta dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023. Deeqaha Dibabadda ayaa la helay dakhli dhan 175M, wuxuuna ka hooseeyaa 16% wadarta deeqaha dibadda ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023.



Jaantuska 2^{aad}: Dhabta Dakhliga Oct-Dec, 2020-2024




Jaantuska 1^{aad}: Saamiga Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda

Sida ka muuqato Jaantuska 1^{aad} Deeqda Dibadda ayaa 63% ka ah wadarta dakhliga dawladda ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024, halka 37% laga helay dakhliga gudaha. Sannadka 2023 Dakhliga gudaha ayaa 32% ka ahaa wadarta dakhliga Dawladda ee la helay saddex biloodlaha afaraad, halka deeqaha dibadda ka ahaa 68% wadarta dakhliga Dawladda.

Wadarta dakhliga gudaha oo ay dawladda soo uruurisay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2020 ayaa ahaa 59M oo 39% ka ahaa wadarta dakhliga dawladda, saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 waxaa la helay 102M oo 37% ka ahaa wadarta dakhliiga dawladda. Mudada u dhaxaysaa afar biloodlaha afaaraad ee sanadaha 2020-2024, Dakhliga gudaha wuxuu kordhay 74% wadarta dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024.

2.1.0 DAKHLIGA GUDAHA

Qaybaha soo socda waxaa lagu faahfaahin doonaa Dakhliga gudaha oo ay dawladdu ka hesho dalka gudahiisa. Waxaa si gaar ah loogu faahfaahin doonaa dakhliga gudaha ee dawladda soo galay saddex biloodlaha afaraad ee sanadaha 2020-2024.



Jaantuska 1^{aad} wuxuu muujinayaa dhabta dakhliga la helay oo loo kala qaaday dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda intii lagu guda jiray saddex biloodlaha afaraad ee sanadaha 2020-2024. Deeqaha dibada ayaa ka badan Dakhliga Gudaha marka laga reebo saddex

Jaantuska 3^{aad}: Qaybaha Dakhliga Gudaha Oct-Dec, 2020-2024


biloodlaha afaraad ee sannadka 2021. Deeqaha Dibadda waxay u badan yihiin dakhli lagu maalgeliyo mashaariicda Bangiga Adduunka iyo Bangiga Horumarinta Afrika ay ka fuliyaan dalka gudahiisa.

Nooca Canshuurta	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dakhliga Canshuurta	38,913,315	44,665,608	61,437,398	62,146,108	75,742,894
Dakhliyada Kale	19,701,608	22,083,663	29,320,495	34,974,273	25,962,594
Wadarta Dakhliga Gudaha	\$ 58,614,923	\$66,749,272	\$ 90,757,893	\$ 97,120,381	\$ 101,705,488
% Koror/Naaqus	-18%	14%	36%	7%	5%

Shaxda 3^{aad}: Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha Oct-Dec, 2020-2024

Sida ka muuqata shaxda 3^{aad}, Dakhliga gudaha ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 5% wadarta dakhliga gudaha ee la helay rubaca afaraad ee sannadka 2023. Saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023 dakhliga gudaha wuxuu kordhay 7% marka la barbardhigo sannadkii ka horeeyey ee 2022.

Dakhliga canshuurta waxaa la helay \$76M saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024, wuxuuna ka badan yahay 22% dhabta dakhli dhan \$62M oo la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023. Sidoo kale dhabta dakhliyada kale waxaa la helay dakhli dhan




Jaantuska 4^{aad}: Saamiga Canshuuraha & Dakhliyada Kale

dakhliyada kale laga helay 35M oo u dhiganta 36% wadarta dakhliga gudaha.


\$26M, wuxuuna ka hoosaysaa 26% dhabta dakhliyada kale oo la helay \$34M saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023. Sida ka muuqata jaantuska 4^{aad}, Saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024, dakhliga canshuurta waxaa la helay 76M oo u dhiganta 74% wadarta Dakhliga Gudaha, halka dakhliyada kale laga helay 26M oo u dhiganta 26% wadarta Dakhliga Gudaha. Sannadkii ka horeeyey ee 2023 dakhliga canshuurta waxaa la helay 62M oo u dhiganta 64% wadarta Dakhliga Gudaha, halka

2.1.1 Dakhliga Gudaha ee Billaha ah

Jaantuska 5^{aad} wuxuu muujinayaan dhabta dakhliga billaha ee la helay bilaha Jan-Dec ee sanadaha 2020-2024. Celcelis ahaan Dakhliga Gudaha ee billaha ah Jan-Dec 2024 wuxuu noqday 30M bishiiba. Halka Jan-Dec ee sannadka 2023, Dakhliga Gudaha ee billaha celcelis ahaan ahaa 26M bishiiba. Bisha Dec 2024 ayaa 8% ka hoosaaya dakhliga la helay bisha december ee sannadka 2023. Sidoo kale dakhliga gudaha ee la helay bish July sannadka 2024 ayaa ka hooseeya 17% dakhliga gudaha ee la helay bisha July 2023.



Jaantuska 5^{aad}: Dakhliga Gudaha ee Bille aha Jan-Dec, 2020-2024



Jaantuska 6^{aad}: Isbadalka Dakhliga Gudaha Jan-Dec 2020-2024

Dakhliga gudaha soo xarooday bisha July 2024 waxaa ka mid ah dakhli la filaayey in lasoo xareeyo bisha Jun 2024 oo usoo gudbay qabashadiisa bisha July 2024. Sida ka muuqata jaantuska 5^{aad} Kororka waxaa kaloo aad sare ugu qaaday bisha Jul 2022 waxaa la helay dakhliga gudaha oo aad u hooseeya, waxaana la helay dakhli dhan \$15M.

Jaantuska 6^{aad} wuxuu muujinayaa boqolayda kororka iyo naaqska marka la is barbardhigo dhabta dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan-Dec ee sanadaha 2020 ilaa 2024. Dakhliga Gudaha kororka ugu badan wuxuu sameeyey bisha July 2023, waxaana soo xarooday dakhli ka badan 134% dakhligii soo xarooday bisha July 2022.


2.1.2 Dakhliga Cashuuraha

Canshuurta	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Canshuurta Dakhliga, iyo Faa'iidada	6,232,426	4,817,082	6,269,507	7,236,496	9,545,453
Canshuurta Agabka iyo Adeega	6,275,958	5,546,512	14,878,631	10,431,669	16,398,964
Canshuurta Furdada	23,187,480	29,860,123	35,938,877	42,478,037	46,571,881
Canshuuraha Kale	3,217,450	4,441,892	4,350,383	1,999,906	3,226,596
Wadarta Dakhliga Canshuurta	\$ 38,913,315	\$ 44,665,608	\$ 61,437,398	\$ 62,146,108	\$ 75,742,894
% Koror/Naaqus	-10%	15%	38%	1%	22%

Shaxda 4^{aad}: Qaybaha Dakhliga Canshuuraha Oct-Dec, 2020-2024

Sida ka muuqata shaxda 4^{aad} Dakhliga Canshuuraha ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 22% dakhliga canshuuraha ee la helay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023. Dakhliga ka soo xarooday Canshuurta Furdada ayaa ah dakhliga ugu badan dakhliga canshuuraha. Saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 waxaana la helay Canshuurta furdada \$47M una u dhiganta **61%** wadarta dakhliga canshuuraha. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa la helay \$16M oo u dhiganta 22% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay rubaca afaraad ee sannadka 2024.

Dakhliga Canshuuraha saamiga ugu badan wuxuu ka soo xaroodaa Canshuurta Furdada, wuxuuna u dhaxeeyaa 58-68% wadarta canshuuraha la helay saddex biloodlaha afaraad ee sanadaha 2020-2024.



Jaantuska 7^{aad}: Dhabta Dakhliga Canshuurta Oct-Dec, 2020-2024

Dakhliga canshuuraha ayaa 22% kordhay saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 marka la barbardhigo sannadkii ka horeeyey ee 2023. Sannadka 2023 wuxuu kor u kacay 1%, sannadka 2022 wuxuu kordhay 38% marka la barbardhigo sannadihii ka horeeyey.

Dhabta dakhliga laga helay qaybaha Dakhliga Canshuuraha ee rubaca 4^{aad} sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay dakhliga la helay

rubaca 4^{aad} ee sannadka 2023. Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay 32% ka badan dakhligii la helay rubaca 4^{aad} ee sannadka 2023. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa samaysay sare u kac dhan 57%, Canshuurta Furdada ayaa 10% sare u kacday, iyo canshuuraha kale oo sare u kacday 61% marka loo fiiriyo dakhliyada soo xarooday rubaca 4^{aad} ee sannadka 2023.

Qaybaha uu ka kooban yahay dakhliga canshuuraha way kordheen saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023, marka laga reebo canshuuraha kale iyo Canshuurta Agabka iyo Adeeg. Canshuurta dakhliga iyo Faa'iidada ayaa korortay 15%, Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa hoos u dhacday 30%, canshuurta Furdada ayaa korortay 18%, balse canshuuraha kale ayaa 54% hoos u dhacay marka loo fiiriyo canshuuraha soo xarooday saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2022.

2.1.3 Dakhliyada Kale

Sida ka muuqato shaxda 5^{aad} wadarta Dakhliyada Kale ee la helay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu ka yar yahay **26%** dakhligii soo xarooday saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023. Saddex biloodlaha saddexaad ee sannadka 2022 ayaa la helay kororkii ugu badan ee Dakhliyada Kale, wuxuuna kordhay 33% marka la barbardhigo sannadkii ka horeeyey ee 2021. Dakhliga libka Agabka iyo Adeega ayaa ah dakhliga ugu muhiimsan ee laga helo dakhliyada kale, wuxuu ka soo xaroodaa Khidmadaha Maamul ee ay bixiso Dawladda, sida dal-kugalka, bixinta shatiyada ganacsiga, bixinta baasaboorada, khidmadaha laga qaado diyaaradaha mara hawada Soomaaliya iyo adeegyada dawladda ka bixiso Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha.

Dakhliga	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dakhliga Hantida	0	0	9,600	2,865,358	224,766
Dakhliga libka Agabka iyo Adeegga	19,701,608	22,083,663	29,310,895	32,046,738	25,422,209
Ganaaxa, Cigaabta	0	0	0	62,178	315,619
Wadarta Dakhliyada Kale	\$ 19,701,608	\$ 22,083,663	\$ 29,320,495	\$ 34,974,273	\$ 25,962,594
% Koror/Naaqus	-30%	12%	33%	19%	-26%

Shaxda 5^{aad}: Dakhliyada Kale Oct-Dec, 2020-2024

Khidmadaha Maamul ee Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdishu waxaa ka soo xarooday dakhli dhan \$12M oo u dhigma 46% wadarta dakhliyada kale. Khidmadaha laga qaado diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay \$5M oo u dhiganta 20% wadarta dakhliyada kale. Wadarta Khidmadaha maamul ee laga helay Dekadda, Garoonka diyaaradaha Muqdishu, iyo diyaaradaha mara hawada Soomaliya waa \$17M oo u dhiganta 66% wadarta dakhliyada kale.

2.2.0 Deeqaha Dibadda

Dakhliga	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Deeqaha Labada Dhinac	7,500,000	2,500,000	0	7,500,000	2,768,685
Deeqaha Dhinacyada Badan	84,601,388	35,069,356	177,552,722	201,185,692	172,681,689
Wadarta Deeqaha Dibadda	\$ 92,101,388	\$ 37,569,356	\$ 177,552,722	\$ 208,685,692	\$ 175,450,374
% Koror/Naaqus	156%	-59%	373%	18%	-16%

Shaxda 6^{aad}: Deeqaha Dibadda Oct-Dec, 2020-2024

Deeqaha dibadda waxay 16% ka hoosaysaa deeqdii la helay saddex biloodlihii afaraad ee sannadkii 2023. Deeqda ugu badan ee la helay ayaa ah deeqaha dhinacyada badan. Saddax biloodlaha afaraad ee sannadka 2023 ayaa la helay 18% ka badan deeqdii la helay sannadkii ka horeeyey ee 2022. Deeqda dhinacyada badan inta badan waxaa lagu bixiyaa kharashaadka mashariicda.

Deeq Bixiyaha	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Turkiga	7,500,000	2,500,000	-	7,500,000	-
Imaaraatka Carabta	-	-	-	-	2,768,685
Wadarta	\$ 7,500,000	\$ 2,500,000	\$ -	\$ 7,500,000	\$ 2,768,685

Shaxda 7^{aad}: Deeq labo dhinacle ah Oct-Dec, 2020-2024

Shaxda 7^{aad} waxay muujinaysaa wadamada laga helay deeqaha laba dhinacclaha ah ee loogu deeqay Dawladda rubaca 4^{aad} ee sannadaha 2020-2024, waxaa laga helay wadamada kala ah; Turkiga, iyo Imaaraatka Carabta. Deeqda ugu badan waxaa la helay rubaca 4^{aad} sannadka 2023 iyo 2020, Dawladda Turkiga oo ugu deeqday \$7.5M.

Deeqda Bixisay	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Bangiga Addunka - IDA	49,643,521	18,727,773	146,447,898	145,597,753	134,693,175
Bangiga Addunka - MPF	5,646,194	13,556,678	29,432,130	50,955,265	31,504,844
Bangiga Hourmarinta Afrika	26,393,591	1,872,530	691,740	4,213,553	2,541,834
Sanduuqa Horumarinta Afrika	-	-	179,138	144,982	763,066
Midowga Yurub	-	-	-	-	148,770
Qaramada Midoobay	2,477,962	-	-	-	-
Ha'yadda Iskaashaiga Waxbarashada (GPE)	440,120	912,375	801,816	274,138	-
OPEC	-	-	-	-	3,030,000
Wadarta Deeqada	\$ 84,601,388	\$ 35,069,356	\$ 177,552,722	\$ 201,185,692	\$ 172,681,689
% Koror/Naaqus	197%	-59%	406%	13%	-14%

Shaxda 8^{aad}: Deeqda Dhinacyada Badan Oct-Dec, 2020-2024

Wadarta Deeqda dhinacyada badan ee la helay saddex biloodka 4^{aad} ee sannadka 2024 waxay ka hoosaysaa 14% deeqdii la helay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadkii hore 2023.

Shaxda 8^{aad} ayaa soo bandhigayso hay'adaha laga helay deeqaha dhinacyada badan, Bangiga Adduunka oo ah iskudarka deeqaha laga helay IDA iyo MPF ayaa 96% wadarta deeqaha dhinacyada badan ee ugu deeqday Dawladda saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. OPEC ayaa ugu deeqday Dawladda 2% wadarta deeqaha dhinacyada badan. Bangiga Horumarinta Afirka ayaa laga helay 2% wadarta deeqaha dhinacyada badan.

Nooca deeqada	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Kabka Miisaaniyadda	7,500,000	2,500,000	2,841,783	20,741,019	5,947,455
Kabka Mashaariicda	84,601,388	35,069,356	174,710,940	187,944,672	169,502,920
Wadarta Deeqda	\$92,101,388	\$37,569,356	\$177,552,722	\$ 208,685,692	\$175,450,374

Shaxda 9^{aad}: Deeqaha Kabka Vs Deeqaha Mashaariicda

Deeqaha Dibadda oo ay dawladda heshay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 waxaa kab miisaaniyadeed ka ah 3% wadarta deeqaaha la helay; kab miisaaniyadeedku waa deeq dawladda loo siiyey inay ku bixiso kharashaadkeeda sida ay dawladdu u qorshaysato, inay ku bixiso kharashaadkeeda hawl fulinta, 97% wadarta deeqaha la helay rubaca 4^{aad} ee sannadka 2024 waa kab mashaariic oo aan dakhligooda loo isticmaali karin hawl ka baxsan mashaariicda loogu talagalay.

Faahfaahin	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dakhliga Gudaha	58,614,923	66,749,272	90,757,893	97,120,381	101,705,488
Kharashaadka Dowladda	104,779,633	107,153,025	130,734,049	127,252,812	143,394,485
% Dakhliga Gudaha	56%	62%	69%	76%	71%

Shaxda 10^{aad}: Dakhliga Gudaha Vs Kharashaadka Dawladda Oct-Dec, 2020-2024

Shaxda 10^{aad} waxaa ka muuqdo is barbardhigaysaa dhabta dakhliga gudaha iyo kharashaadka hawl fulinta ay dawladdu bixisay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2020–2024. Sida ay soo bandhigayso shaxda 10^{aad}, Dakhliga Gudaha ayaa daboolay 71% kharashaadka hawl fulinta oo ay dawladdu bixisay saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Sidoo kale, saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023 Dakhliga Gudaha wuxuu daboolay 76% kharashaadka hawl fulinta dawladda ee la bixiyey. Farqiga u dhaxeeya dakhliga gudaha iyo kharashaadka hawl fulinta Dawladda waxaa laga bixiyey deeqaha kabka miisaaniyadda ay dawladdu ka hesho deeqaha dibadda.

Faahfaahin	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Daymaha Gudaha	0	0	0	0	0
Daymaha Dibadda	0	43,054,944	0	0	0
Wadarta Daymaha	0	\$ 43,054,944	0	0	0

Shaxda 11^{aad}: Daymaha Dawladda

Shaxda 11^{aad} waxay soo bandhigaysaa dayamaha ama horumariska ay dawladdu soo qaadatay saddex biloodlaha afaraad ee sanadaha 2020-2024. Daymaha dibadda waxaa lagu diiwaan galiyey lacag la sarifay oo SDR (Special Drawing Rights) ah oo ay Hay'adda Lacagta Aduunka Dawladda u siisay labo qayb oo isla eg; Hanti (Asset) iyo Qoonodo (Allocation), waxayna dawladdu kala baxday qoondada SDR lacagta ku xusan daymaha dibadda. Inta ay dawladdu dib u bixinayso qoondada ay kala baxday waxay ka mid noqonaysaa daymaha dibadda ee dawladda lagu leeyahay. Waxaa loo isticmaalay bixinta kharashadka joogta ee dawladda sannadka 2021.

3.0 MIISAANIYADDA IYO DHABTA KHARASHAADKA EE SANNADKA 2024

Nooca Kharashka	Miisaaniyadda Sannadka	Jan-Mar 2024	Apr-Jun 2024	Jul-Sep-2024	Oct-Dec 2024	Wadarta	% Fulinta
Mushaarka Shaqaalaha	362,327,754	80,562,507	82,224,593	84,660,877	94,126,760	341,574,738	94%
Isticmaalka Agabka & Adeega	276,185,020	28,121,036	44,019,695	52,283,818	80,078,813	204,503,361	74%
Dulsaarka	7,549,171	156,205	926,033	136,727	4,605,227	5,824,192	77%
Kabka	13,610,000	1,659,990	1,512,763	2,036,781	3,742,833	8,952,366	66%
Deeqaha	205,219,088	13,915,882	35,562,284	37,318,090	73,542,546	160,338,802	78%
Faa'idada Bulshada	161,561,956	0	82,552,053	9,154,498	62,104,043	153,810,594	95%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	52,862,794	1,205,916	2,271,176	8,626,674	16,415,628	28,519,394	54%
Dib u Bixinta Daymaha	0	764,339	0	915,200	0	1,679,539	0%
Wadarta	\$1,079,315,784	\$126,385,875	\$249,068,598	\$195,132,665	\$334,615,850	\$905,202,987	84%

Shaxda 12^{aad}: Fulinta Miisaaniyadda Sannadka 2024

Dhaqan-gelinta miisaaniyadda kharashka ee bilaha Jan-Dec sannad maaliyadeedka 2024, waxaa la bixiyey kharash dhan 905M oo u dhiganta **84%** wadarta saadaalinta kharash bixinta ee miisaaniyad sanadeedka 2024. Kharashaadka Faa'idada Bulshada ayaa ugu sareeyey fulinta miisaaniyadda, waxaana la bixiyey kharash dhan 154M oo u dhiganta **95%** miisaaniyadda sannadka 2024. Mushaarka Shaqaalaha ayaa la bixiyey 342M oo u dhiganta **94%** miisaaniyadda sannadka 2024. Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey 205M oo u dhiganta **74%** miisaaniyadda sannadka.

Hay'adaha	Miisaaniyadda Sannadka	Jan-Mar-2024	Apr-Jun-2024	Jul-Sep-2024	Oct-Dec-2024	Total	% Fulinta
Hay'adaha Maamulka	379,995,638	49,423,096	66,264,831	79,293,918	126,184,250	321,166,095	85%
Hay'adaha Amniga	256,201,790	56,057,780	58,539,423	57,873,481	62,809,465	235,280,151	92%
Hay'adaha Dhaqaalaha	177,407,797	12,281,065	36,569,001	32,834,056	47,644,652	129,328,774	73%
Hay'adaha Bulshada	265,710,558	8,623,933	87,695,343	25,131,210	97,977,482	219,427,968	83%
Wadarta Kharashka	\$1,079,315,784	\$126,385,875	\$249,068,598	\$195,132,665	\$334,615,850	\$905,202,987	84%


Shaxda 13^{aad}: Fulinta Miisaaniyadda Sannadka 2024 - Hay'adaha Dawladda

Shaxda 13^{aad} waxay soo bandhigaysaa sida loo fuliyey miisaaniyadda sannadka 2024, iyadoo loo fiirinaayo qaybaha loo kala saaro hay'adaha Dawladda. Hay'adaha Amniga ayaa ugu sareeya fulinta miisaaniyadda laba & tobanka bilood ee sannadka 2024, waxaana la bixiyey \$235M oo u dhiganta 92% miisaaniyad sanadeedka 2024, Hay'adaha Mamulka ayaa lagu bixiyey \$321M oo u dhiganta 85%. Hay'adaha arimaha bulshada ayaa lagu bixiyey \$219M oo u dhiganta 83% miisaaniyadda sannadka. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey \$129M oo u dhiganta 73% miisaaniyadda sannadka 2024.

3.1 DHABTA KHARASHAADKA DAWLADDA OCT-DEC, 2020-2024

Hay'adaha	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Hay'adaha Maamulka	83,875,958	63,564,456	107,379,015	87,852,795	126,184,250
Hay'adaha Amniga	42,903,520	44,976,597	47,854,954	53,788,302	62,809,465
Hay'adaha Dhaqaalaha	9,962,286	11,875,142	24,688,885	45,362,318	47,644,652
Hay'adaha Bulshada	45,213,904	23,486,134	129,610,563	127,549,316	97,977,482
Wadarta Kharashka	\$181,955,669	\$143,902,329	\$309,533,418	\$314,552,731	\$334,615,850
% Koror/Naaqus	64%	-25%	115%	2%	6%

Shaxda 14^{aad}: Dhabta Kharashaadka Hay'adaha Oct-Dec, 2020-2024



Jaantuska 8^{aad}: Kharashaadka Hay'adaha Oct-Dec, 2020-2024

Sida ka muuqata jaantuska 8^{aad} wuxuu soo bandhigayaa kharashaadkii ku baxay hay'adaha kala duwan ee Dawladda saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2020–2024. Hay'adaha Maamulka waxaa ku baxay kharash dhan 126M oo u dhiganta 38% wadarta khashashaadka la baxiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024.

Hay'adaha Amniga ayaa lagu bixiyey kharash dhan 63M oo u dhiganta 19%, Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey 48M oo u dhiganta 14% wadarta kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Hay'adaha Arimaha Bulshada ayaa lagu bixiyey kharash dhan 98M oo u dhiganta 29%.


Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023, isku darka kharashka ku baxay Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada wuxuu ahaa **55%** wadarta kharashaadka Dawladda ee la bixiyey sannadka. Halka Hay'adaha Maamulka iyo Amniga lagu bixiyey **45%** wadarta kharashka la bixiyey saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023.

3.2 Noocyada Kharashaadka

Nooca Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Mushaarka Shaqaalaha	69,257,349	66,891,105	72,448,878	86,959,863	94,126,760
Isticmalka Agabka & Adeega	29,032,636	46,743,344	60,882,384	51,680,348	80,078,813
Dulsaarka	458,806	450,074	214,200	240,125	4,605,227
Kabka	706,399	5,644	3,304,410	571,069	3,742,833
Deeqaha	35,377,748	13,699,291	27,935,498	58,258,209	73,542,546
Fa'idada Bulshada	34,200,127	6,149,166	134,245,248	110,225,006	62,104,043
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	7,914,610	5,008,975	6,205,478	3,391,250	16,415,628
Dib u Bixinta Daymaha	5,007,994	4,954,731	4,297,323	3,226,861	0
Wadarta Kharashaadka	\$ 181,955,669	\$ 143,902,329	\$ 309,533,418	\$ 314,552,731	\$ 334,615,850

Shaxda 15^{aad}: Noocyada Kharashaadka Oct-Dec, 2020-2024

Shaxda 15^{aad} waxay muujinaysaa meelaha ay ku baxeen kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2020-2024. Mushaarka Shaqaalaha Dawladda ayaa la bixiyey **94M** oo u dhiganta **28.1%** wadarta kharashaadkii la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa lagu bixiyey **80M** oo u dhiganta **24%**, Deeqaaha la siiyo maamul goboleedyada dalka waxaa lagu bixiyey **73M** oo u dhiganta **22%** kharashaadka la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Kharashaadka Faa'idada Bulshada ayaa la bixiyey **62M** oo u dhiganta **19%** saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024.



Jaantuska 9^{aad}: Kharashka Bille ah Jan-Dec, 2020-2024


Jaantuska 9^{aad} wuxuu soo bandhigayaa kharashka billaha ah ee la bixiyey laba & tobanka bilood ee sanadaha 2020 – 2024. Sannadka 2024 waxaa kordhay kharash bixinta billaha ah marka la barbardhigo sanadhihii ka horeeyey. Bisha Dec ee sannada 2022 waxaa la bixiyey kharashkii ugu badnaa laga soo bilaabo sannadka 2020-2024. Kharashaadka la bixiyey bisha Dec 70% ka badan waa kharashaad mashaariicda ee laga maalgeliyo deeqaha dibadda. Sidoo kale bilaha Jun iyo Dec 2024, Oct 2022 kharashaadka ugu badan ee la bixiyey waa kharashaad laga bixiyey mashaariicda laga maalgaliyo kabka mashaariicda.

3.3 Mushaaraadka Shaqaalaha


Nooca Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Mushaarka	40,622,615	38,398,647	40,404,472	45,615,059	50,189,933
Gunada	23,593,381	22,952,472	27,088,397	32,388,839	33,295,600
Kharashaadka Kale ee Shaqaalaha	5,041,353	5,539,986	4,956,009	8,955,965	10,641,227
Wadarta Mushaarka	\$ 69,257,349	\$ 66,891,105	\$ 72,448,878	\$ 86,959,863	\$ 94,126,760
% Koror/Naaqus	46%	-3%	8%	20%	8%

Shaxda 16^{aad}: Mushaaraadka Shaqaalaha Oct-Dec, 2020-2024

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu 8% ka badan yahay mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey saddex biloodliha 4^{aad} ee sannadka 2023. Sida ay soo bandhigayso shaxda 16^{aad}, kororka ugu badan ee mushaarka shaqaalaha Dawladda wuxuu ahaa rubaca 4^{aad} ee sannadka 2020, wuxuuna gaaray koror dhan **46%** ka badan mushaarkii la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2019. Sannadka 2021 wuxuu ka yaryahay 3% wadarta mushaarka la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2020.



Jaantuska 11^{aad}: Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale



Jaantuska 10^{aad}: Boqolayda Mushaarka Hay'adaha Amniga iyo Hay'adaha kale

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda wuxuu samaynaayey koror laga soo bilaabo sannadka 2020 ilaa 2024, sida ka muuqato jaantuska 10^{aad} iyo 11^{aad} mushaarka shaqaalaha Hay'adaha Amniga waxaa la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2020 lacag dhan \$34M oo u dhiganta 50% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey, halka sannadka 2024 la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} lacag dhan \$47M oo u dhiganta 50% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey rubuca afaraadee sannadka 2024.

Mushaaraadka shaqaalaha Hay'adaha kale waxaa la bixiyey \$35M oo u dhiganta 50% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2020, halka sannadka 2024 la bixiyey lacag dhan \$47M oo u dhiganta 50% wadarta mushaarka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey rubuca afaraad ee sannadka 2024.

Hay'adaha	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Hay'adaha Amniga	34,789,589	32,853,248	34,676,706	41,586,089	46,776,302
Hay'adaha kale	34,467,760	34,037,857	37,772,172	45,373,774	47,350,458
Wadarta Mushaarka	\$69,257,349	\$ 66,891,105	\$ 72,448,878	\$ 86,959,863	\$ 94,126,760

Shaxda 17^{aad}: Mushaaraadka Hay'adaha Amnig Vs Hay'adaha kale

Shaxda 17^{aad} waxay muujinaysaa mushaaraadka ku baxay shaqaalaha dawladda oo loo kala qaaday mushaaraadka ku baxay shaqaalaha Hay'adaha Amniga iyo mushaaraadka shaqaalaha Hay'adaha Kale.

Mushaaraadka ku baxay shaqaalaha Hay'adaha Amniga rubaca 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 12% mushaaraadka ku baxay Hay'adaha Amniga rubaca 4^{aad} ee sannadka 2023. Mushaaraadka ku baxay hay'adaha kale rubaca 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu ka badan 4% mushaaraadka ku baxay hay'adaha kale rubaca afaraad ee sannadka 2023.

Guud ahaa mushaarka wuxuu kordhay 8% sannadka 2024 marka la barbardhigo wadarta mushaaraadka la bixiyey saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2023.


3.4 Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega

Nooca Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Safarka iyo Shirarka	3,062,220	3,519,269	6,761,930	5,750,050	6,955,922
Safarka iyo Shirarka	3,062,220	3,519,269	6,761,930	5,750,050	6,955,922
Kharashaadka Hawl-Fulinta	4,874,441	6,762,159	12,269,163	6,768,781	16,959,273
Hawlaha Guud	1,207,894	1,620,246	2,398,937	1,717,267	2,156,264
Isgaarsiinta	0	0	248,767	278,346	397,057
Shidaalka iyo Saliidaha	1,802,078	2,354,448	3,067,876	2,322,063	3,012,787
Agabka iyo Alaabaha	1,058,238	1,704,481	3,171,053	1,902,447	10,190,711
Dayactir iyo Hagaajin	806,231	1,082,984	3,382,530	548,658	1,202,454
Kharshaadka Kirooyinka	851,954	788,634	1,109,951	803,743	1,971,315
Kirooyinka	851,954	788,634	1,109,951	803,743	1,971,315
Kharshaadka kale ee Hawl-Fulinta	7,797,245	14,003,446	23,644,454	24,672,236	36,863,112
Waxbarashada iyo Tababaradda	1,329,326	927,553	2,372,600	576,985	1,519,202
Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	4,803,688	11,160,703	19,299,714	18,484,807	31,662,110
Adeegyadda Bangiga	1,653,231	1,912,763	1,782,966	2,381,868	3,181,348
Xayeysiinta iyo Heshiis Wax kala libsi	0	0	170,573	187,695	412,764
Caymiska Dadka Guud	11,000	2,428	18,601	3,040,880	87,687
Hawlgaladda Ciidamada	3,006,522	9,055,229	2,542,368	1,907,177	1,816,694
Booliska - Agabka iyo Adeegyada	1,673,379	5,041,726	80,000	60,000	240,000
Nabad Sugidda – Agabka iyo Adeega	910,674	3,752,503	2,282,368	1,487,177	936,694
Xoogga- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	422,470	261,000	180,000	360,000	640,000
Kharashaadka Guud ee kale	9,440,254	12,614,608	14,554,518	11,778,362	15,512,496
Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	9,440,254	12,614,608	14,554,518	11,778,362	15,512,496
Wadarta Kharashaadka	\$ 29,032,636	\$ 46,743,344	\$ 60,882,384	\$ 51,680,348	\$ 80,078,813
% Koror/Naaqus	-36%	61%	30%	-15%	55%


Shaxda 18^{aad}: Isticmaalka Agabka iyo Adeega Oct-Dec, 2020-2024

Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega, waa kharashka labaad ee ugu badan kharashka billaha ah oo ay dawladdu bixiso bishii, 24% wadarta kharashka la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu ahaa kharash ku baxay Isticmaalka Agabka iyo Adeega. Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 waxa uu kordhay 55% marka la barbardhigo saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadkii hore 2023.


Kharashka ugu badan Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 waa kharashaadka kale ee howl fulinta oo ku baxday lacag dhan 37M oo u dhiganta 46% wadarta kharashaadka la bixiyey ee Isticmaalka Agabka iyo Adeega.




Jaantuska 13^{aad}: Kharashaadka Safarka & Shirarka



Jaantuska 12^{aad}: Kharashaadka Hawl-fulinta



Jaantuska 14^{aad}: Kharashaadka Kirooyinka




Jaantuska 15^{aad}: Kharashaadka kale ee Hawl-fulinta

Kharashka Safarka iyo Shirarka ee la baxiyey saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 ayaa ahaa \$7M oo u dhiganta 9% wadarta kharashaadka la bixiyey ee Isticmaalka Agabka iyo Adeega. Saddex biloodlaha labaad ee sannadka 2023 waxaa la bixiyey \$6M. Kororka ugu badan uu sameeyey ayaa ahaa **92%** saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2022 marka loo barbardhigo saddex biloodlaha saddexaad ee sannadka ka horeeyey ee 2021.


Kharashaadka Hawl-fulinta oo faah-faahintiisu ka muuqato shaxda 18^{aad} waxaa la baxiyey 17M oo u dhiganta 21% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la baxiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Wuxuu sare u kacay 151% wadarta kharashaadka hawl fulinta ee la bixiyey sannadka 2024 marka la barbardhigo kharashaadkii hawlfulint ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023.

Kharashaadka ku baxay kirooyinka waxaa la bixiyey 1.9M oo u dhiganta 2% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la baxiyey saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024. Kharashka kirooyinka ee la baxiyey saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 145% kharashaadkii la baxiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023.

Kharashaadka kale ee howlfulinta waa kharashka ugu badan ee Isticmaalka Agabka iyo Adeega la bixiyey rubaca 4^{aad} ee sannadka 2024. Waxaa la bixiyey 37M oo u dhiganta 46% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la baxiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Kharashaadka kale ee howlfulinta ee la baxiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxuu 49% ka badan yahay \$25M oo la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023.



Jaantuska 16^{aad}: Hawlgaladda Ciidamada



Jaantuska 17^{aad}: Kharashaadka Guud ee kale

Kharashaadka howlgaladda ciidamada waxaa la bixiyey \$1.8M oo u dhiganta 2% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega, wuxuuna hoos u dhacay 5% saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 marka la barbardhigo sannadkii hore ee 2023 oo la bixiyey 1.9M. Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023 waxa uu hoos u dhacay 25% marka la barbardhigo kharashaadka la bixiyey sannadkii ka horeeyey ee 2022.

Kharashaadka kale ee guud waxaa la bixiyey 15M oo u dhiganta 19% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega. Wuxuuna kordhay 32% saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 marka la barbardhigo kharash \$12M oo la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadkii hore ee 2023. Kharashka ugu badan kharashaadka guud ee kale waa kharashaadka ku baxay raashinka ciidamada.

3.5 Dulsaarka Daymaha

Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	458,806	450,074	214,200	240,125	4,605,227
Dulsaarka la Siinayo Dadka Degan Dalka	0	0	0	0	0
Wadarta	\$458,806	\$450,074	\$214,200	\$240,125	\$4,605,227

Shaxda 19^{aad}: Dulsaarka Daymaha Oct-Dec, 2020-2024

Shaxda 19^{aad} waxay muujinaysaa dulsaarka daymaha ee la bixiyey saddex biloodlaha afaraad ee sanadaha 2020 ilaa 2024. Waxaa la siiyaa hay'adaha caalamiga ah ee daynta mudada fog ku lahaa Dawladda.

3.6 Kabka

Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Kabka lasiiyo Shirkadaha Gaarka ah aan ka Shaqaynin Maaliyadda	706,399	5,644	3,304,410	571,069	3,742,833
Wadarta Kabka	\$706,399	\$5,644	\$3,304,410	\$571,069	\$3,742,833

Shaxda 20^{aad}: Kabka Oct-Dec, 2020-2024

Shaxda 20^{aad} waxay soo bandhigaysaa kharashaadka lagu bixiyey maalgelinta ee la siiyo shirkadaha yaryar ee ku ganacsada dalka gudihiisa, waxaa lagaa bixiyaa mashaariicda uu maalgaliyo Bangiga Adduunka. Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 waxaa la bixiyey lacag dhan 3.7M. Waxayna ka badan tahay 555% waarta kharashaadkii la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadkii 2023.

3.7 Deeqaha

Nooca Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	0	509,579	639,346	31,758,461	17,015,721
Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda	35,377,748	13,189,711	24,053,712	20,116,542	48,624,008
Deeqaha Raasumaalka ah ee Qaybaha kale ee Dowladda	0	0	3,242,439	6,383,207	7,902,817
Wadarta Deeqada	\$ 35,377,748	\$ 13,699,291	\$ 27,935,498	\$ 58,258,209	\$ 73,542,546
Koror/Naaqus	226%	-61%	104%	109%	26%

Shaxda 21^{aad}: Deeqaha Oct-Dec, 2020-2024

Kharashaadka deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka, Gobolka Banaadir iyo lacagaha lasiiyo hay'adaha caalamiga ah ay dawladdu xubinta ka tahay waxaa la bixiyey 74M oo u dhiganta 22% wadarta kharashaddka la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Kharashaadka Deeqaha ayaa kor u kacay 26% saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 marka la barbardhigo kharashaadkii la bixiyey saddex biloodlihii ka horeeyey ee sannadka 2023.

Deeqaha Joogtada ee la siiyo Hay'adaha Caalamiga, 17M waxaa laga bixiyey mashaariicda Bangiga Adduunka maalgaliyo, waxaana la siiyey hay'adao caalami ah si looga fuliyo adeegyo caafimaad dalka gudahiisa.

Hay'adaha Dawladda	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Bangiga Horumarinta Soomaaliya	121,010	138,746	171,841	203,088	224,496
Rugta Ganacsiga Soomali	121,010	138,746	171,841	203,088	224,496
Dawladd Goboleedka Somaliland	55,000	18,000	30,000	0	0
Dawladd Goboleedka Puntland	10,867,974	2,883,460	4,223,774	2,225,015	9,376,281
Dawladd Goboleedka Jubbaland	3,761,943	1,256,136	3,308,599	6,087,479	4,275,692
Dawladd Goboleedka Koofur-galbeed	4,378,096	1,948,681	5,916,128	4,505,024	11,469,019
Dawladd Goboleedka Galmudug	6,086,269	1,499,272	4,268,219	3,185,239	8,667,253
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle	3,556,137	1,144,304	1,911,967	3,014,597	8,140,867
Maamulka Gobolka Benadir iyo Dawladda Hoose ee Muqdishu	6,430,308	4,162,367	5,993,781	7,076,219	14,148,720
Wadarta	\$ 35,377,748	\$ 13,189,711	\$ 25,996,152	\$ 26,499,749	\$ 56,526,825
	226%	-63%	97%	2%	113%

Shaxda 22^{aad}: Kharashaadka Dawlad Goboleedyada Oct-Dec, 2020-2024

Deeqaha la siiyo Dawlad goboleedyada iyo Gobolka Banaadir waxaa loo wareejiyey lacag dhan 56M oo u dhiganta 17% wadarta kharashaadka Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 wuxu kor u kacay 113% marka la barbardhigo deeqihii la bixiyey oo ahayd \$26M saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2023.

Deeqalaha la siiyo dawlad goboleedyada waxay isugu jiraan deeqo laga bixiyo dakhiliga gudaha ee Dawladda iyo kuwo laga bixiyey mashaariicda Bangiga Aduunka uu maalgaliyo.

3.8 Faa'idada Bulshada

Nooca Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag Cadaan ah	26,500,000	6,149,166	67,068,725	78,710,424	56,604,043
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag ahayn	0	0	14,294,085	5,514,582	0
Gargaarka Bulshadda - Lacag ahaan	7,700,127	0	46,882,438	0	0
Gargaarka Bulshadda - Lacag ahayn	0	0	6,000,000	26,000,000	5,500,000
Wadarta	\$ 34,200,127	\$ 6,149,166	\$ 134,245,248	\$ 110,225,006	\$ 62,104,043

Shaxda 23^{aad}: Faa'idada Bulshada Oct-Dec, 2020-2024

Shaxda 23^{aad} waxay muujinaysaa kharashaadka lagu bixiyey Faa'idada Bulshada. Saddex biloodlaha 4^{aad} sannadka 2024 waxaana la bixiyey kharash dhan 62M oo u dhiganta 19% wadarta kharashaadka Dawladda ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Kharashkan waxaa laga bixiyaa mashaariicda Bangiga Adduunka waana lacag caddaan ama wax u dhigma oo lasiiyo barakacayaasha iyo qoysaska nugul ee ku nool dalka gudahiisa.

3.9 Hantida aan maaliyada ahayn (hantida maguurtada ah)

Nooca Kharashka	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	37,081	830,237	726,482	128,974	0
Qalabka iyo Mashiinadda	5,285,291	1,109,053	2,417,486	2,350,937	12,018,666
Hantida kale ee Maguurtada ah	2,592,239	3,069,685	3,061,511	911,339	4,091,962
Nidaamyada Hubka	-	-	-	-	305,000
Wadarta	\$ 7,914,610	\$ 5,008,975	\$ 6,205,478	\$ 3,391,250	\$ 16,415,628
	1034%	-37%	24%	-45%	384%

Shaxda 24^{aad}: Hantida aan Maaliyadda ahayn Oct-Dec, 2020-2024


Shaxda 24^{aad} waxaa ka muuqda kharashaadka ku baxay soo iibinta hantida ma guurtada ah, waxaa lagu bixiyey 16M oo u dhiganta 5% kharashaadka guud ee la bixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024. Wuxuuna kordhay 384% marka la barbardhigo kharashka lagu bixiyey soo iibinta hantida maguurtada ee sannadka 2023.

3.10 Dib u Bixinta Dayamaha

Nooca Kharash	Oct-Dec 2020	Oct-Dec 2021	Oct-Dec 2022	Oct-Dec 2023	Oct-Dec 2024
Dib u bixinta Dayamaha	5,007,994	4,954,731	4,297,323	3,226,861	-
Wadara	\$ 5,007,994	\$ 4,954,731	\$ 4,297,323	\$ 3,226,861	\$ -

Shaxda 25^{aad}: Dib u bixinta Dayamaha Oct-Dec, 2020-2024


Shaxda 25^{aad} waxay muujinaysaa kharashaadkii ku baxay dib u bixinta dayamaha ee saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadaha 2020 ilaa 2023. Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 ma jirin wax dayn ah oo la bixiyey sida ku cad shaxdan.


Abdirahman Mohamed Anas,
 Xisaabiyaha Guud-DFS

4.0 MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA
Dawladda Federaalka Soomaaliya
Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka
Ee Saddex Biloodlaha Afaraad 1^{da} Oct ilaa 31^{da} Dec 2024

	Fahfahin	Oct-Dec 2024 USD\$	Oct -Dec 2023 USD\$	% Farqiga
Dakhliga				
Dakhliga Canshuurta	1	75,742,894	62,146,108	22%
Dakhliyada Kale	2	25,962,594	34,974,273	-26%
Deqaha Dibadda	3	175,450,374	208,685,692	-16%
Wadarta Guud		277,155,862	305,806,073	-9%
Kharashaadka				
Mushaarka Shaqaalaha	4	94,126,760	86,959,863	8%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	5	80,078,813	51,680,348	55%
Qalab hantida ma guurtada ah	6	16,415,628	3,391,250	384%
Deeqaha la bixiyey	7	73,542,546	58,258,209	26%
Dulsaarka Daymaha	8	4,605,227	240,125	1818%
Kaalmo Dhaqaale	9	3,742,833	571,069	555%
Kaalmo Bulsho	10	62,104,043	110,225,006	-44%
Dib u bixinta daymaha	11	0	3,226,861	-100%
Wadarta Kharashaadka		334,615,850	314,552,731	6%
Dheeri/(Dhiman)Dhamaadka 31^{ka} Dec		-57,459,987	-8,746,658	557%
Haraaga Khaashka Bilowga 1^{da} Oct		163,730,126	107,504,067	52%
Dheeri/(Dhiman)Dhamaadka 31^{ka} Oct		-57,459,987	-8,746,658	557%
Haraaga Khaashka Dhamaadka 31^{ka} Oct	12	106,270,139	98,757,409	8%


Sida ku cad faahfaahinta tirsi 12^{aad} lacag gaaraysa US\$**37,153,432** & US\$**50,066,619** oo ku jirta muuqaalka haraaga xisaabaadka Dawladda ku haray dhammaadka saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023 waxay gaar u tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo, loomana isticmaali karo ujeedo ka duwan sida lagula heshiiyey deeq bixiyayaasha. Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaabxirka ee ku qoran laga bilaabo boga 4^{aad} kuna eg bogga 4^{aad} waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaabxirka.


Abdirahman Mohamed Anas,
 Xisaabiyaha Guud-DFS

**5.0 MUUQAALKA ISBARBARDHIGGA SAADAASHA MIISAANIYADDA IYO
NATIIJADA DHABTA AH
Dawladda Federaalka Soomaaliya
Muuqaalka Isbar-bardhig Miisaaniyadda iyo Dhabta
Jan-Dec 2024**

Dakhliga Miisaaniyadda/Kharashadaka	Faa hfah inta	Kutalagalki Hore USD\$	Kutalagalka Danbe USD\$	Dhabta USD\$	Haraa USD\$	% Haraa
Dakhliga						
Dakhliga						
Dakhliga Canshuurta	1	241,427,153	241,427,153	266,763,916	-25,336,763	-10%
Dakhliyada Kale	2	104,789,993	104,756,475	102,589,875	2,166,600	2%
Deeqaha Labada Dhinac	3	68,121,168	68,121,168	29,698,555	38,422,613	56%
Deeqaha Dhinacyada Badan	3	626,502,087	626,502,087	513,663,372	112,838,714	18%
Wadarta Dakhliga		1,040,840,401	1,040,806,882	912,715,718	128,091,164	12%
Kharashadaka						
Mushaarka Shaqaalaha	4	362,327,754	362,327,754	341,574,738	20,753,016	6%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	5	276,185,020	276,185,020	204,503,361	71,681,659	26%
Dulsaarka Daymaha	8	7,549,171	7,549,171	5,824,192	1,724,979	23%
Kaalmo Dhaqaale	9	13,610,000	13,610,000	8,952,366	4,657,634	34%
Deeqaha la bixiyey	7	205,219,088	205,219,088	160,338,802	44,880,285	22%
Kaalmo Bulsho	10	161,561,956	161,561,956	153,810,594	7,751,362	5%
Dib u bixinta daymaha	11		0	1,679,539	-1,679,539	0%
Wadarta Kharashka		1,026,452,989	1,026,452,989	876,683,593	149,769,396	15%
Hantida aan Maaliyadda ahayn						
Soo ibsasho qalab ra'sulmaal	6	52,862,794	52,862,794	28,519,394	24,343,400	46%
Wadarta Kharashaadka ra'sulmaalka		52,862,794	52,862,794	28,519,394	24,343,400	46%
Wadarta Kharashaadka		1,079,315,784	1,079,315,784	905,202,987	174,112,796	16%
Saafiga Qul-Qulka Kashka		-38,475,383	-38,508,902	7,512,730	0	0%

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab-xirka ee ku qoran laga bilaabo boga 4^{aad} kuna eg bogga 42^{aad} waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaabxirka.


Abdirahman Mohamed Anas,
Xisaabiyaha Guud-DFS

7.0 ISTICMAALKA MIISANIIYADDA EE HAY'ADAHA DAWLADDA
ee sannadka ku Dhammaaday 31 Dec 2024
Iyadoo loo eegayo qoondada hay'addaha Dawladda

	Dhabta	Ku talagalka Danbe	Ku talagalka Asalka	% Fulinta
Hay'adaha Maamulka	321,166,095	379,995,638	382,907,771	85%
Xafiiska Madaxtooyada	11,968,251	12,077,569	11,527,780	99%
Xafiiska Golaha Shacabka	27,333,206	27,954,786	27,831,101	98%
Xafiiska Aqalka Sare	7,055,560	7,138,210	7,055,560	99%
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	10,493,598	10,510,077	9,056,897	100%
Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga	3,513,565	3,966,188	3,893,903	89%
Safaaradaha	5,040,480	5,412,779	5,433,329	93%
Wasaaradda Maaliyadda	86,002,085	111,616,078	128,913,123	77%
Xafiiska Xisaabiyaha Guud	3,315,761	3,414,154	3,357,124	97%
Adeega Guud ee Dowladda	97,008,135	102,727,414	91,299,756	94%
Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya	774,058	944,452	944,452	82%
Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha	12,700,850	23,443,473	23,443,323	54%
Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya	10,709,998	12,512,670	12,516,450	86%
Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta	6,032,685	15,806,427	17,305,752	38%
Hey'adda Qoxootiga iyo Barakacayaasha Qaran	796,242	846,490	856,840	94%
Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha	1,164,855	1,982,655	1,959,240	59%
Hey'adda Maaraynta Masiibooyinka	4,804,235	5,114,425	3,164,698	94%
Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka	3,187,196	3,378,527	3,363,497	94%
Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka	2,136,921	2,490,530	2,474,915	86%
Ciidanka Asluubta	11,231,376	11,429,440	11,429,440	98%
Maxkamdda Sare	2,376,537	2,675,547	2,715,177	89%
Maxkamadda Gobollka Banaadir	1,947,745	2,053,474	2,110,504	95%
Maxkamadda Racfaanka	836,675	923,094	937,179	91%
Guddiga Adeegga Garsoorka	132,822	205,497	227,592	65%
Xeer-ilaaliyaha Guud	1,670,574	1,813,283	1,809,548	92%
Garyaqaanka Guud	658,400	706,400	706,400	93%
Xafiiska Hantidhowka Guud	3,920,429	3,967,819	3,716,171	99%
Guddiga M. Banaan Ee Xududaha & Federalka	338,680	400,360	400,360	85%
Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Heshiisiinta Qaranka	459,572	489,872	482,972	94%
Guddiga Madax Bannaan Doorashooyinka Qaranka iyo Soodimaha	1,190,427	1,320,560	1,320,560	90%
Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka	797,690	958,186	947,836	83%
Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda	1,423,486	1,571,084	1,562,174	91%
Guddiga Madax Bannaan Ee La-Dagaalanka Musuqmaasuqa	144,000	144,120	144,120	100%
Hay'adaha Amniga	235,280,151	256,201,790	255,626,335	92%
Wasaaradda Gaashaandhigga	1,351,202	3,744,210	3,768,855	36%
Ciidanka Xoogga Soomaaliyeed	152,329,193	170,370,555	170,540,555	89%
Maxkamadda Ciidamadda	3,738,252	3,740,000	3,740,000	100%
Hay'adda Naafada iyo Agoonta C. Qalabka Sida	60,000	93,000	93,000	65%
Wasaaradda Amniga Gudaha	1,218,633	1,609,679	1,614,089	76%
Ciidanka Booliska Soomaaliyeed	46,846,533	46,901,986	46,741,986	100%
Hey'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka	24,326,720	24,326,720	23,712,210	100%
Hey'adda Sodaalka iyo Jinsiyadda	5,409,617	5,415,640	5,415,640	100%
Hay'adaha Dhaqaalaha	129,328,774	177,407,797	232,106,530	73%

Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha	9,412,106	12,837,873	64,398,089	73%
Wasaaradda Batroolka & Macdanta	1,526,374	2,231,219	2,205,884	68%
Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed	814,322	1,062,440	1,044,620	77%
Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka	33,485,257	50,192,192	50,162,069	67%
Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa	1,835,903	3,548,257	8,219,352	52%
Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah	2,578,318	9,584,500	9,579,910	27%
Hey'adda Cilmi Baarista Baddaha Soomaaliyeed	582,206	631,358	621,968	92%
Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga	67,477	112,776	112,776	60%
Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska	4,769,288	6,305,539	6,308,974	76%
Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada	2,595,255	6,869,437	11,357,347	38%
Hey'adda Isgaarsiinta Qaranka	685,477	863,379	871,884	79%
Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyaynta	52,184,180	60,444,579	54,471,107	86%
Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	2,022,262	3,332,606	3,319,376	61%
Hay'adda Duulista Hawadda	9,116,732	9,662,284	9,662,284	94%
Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda	1,538,224	2,533,219	2,542,804	61%
Dekadda Xamar	930,200	1,032,200	1,032,200	90%
Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha	2,574,044	2,696,127	2,724,054	95%
Hey'adda Tayo Dhowrka	1,264,866	2,003,166	2,007,576	63%
Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada	1,346,282	1,464,646	1,464,256	92%
Hay'adaha Bulshada	219,427,968	265,710,558	208,675,147	83%
Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada	55,934,174	67,122,936	52,369,912	83%
Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare	27,098,788	48,856,842	65,146,035	55%
Jaamacadda Umadda	8,078,656	8,272,680	8,272,680	98%
Akadeemiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suuggaanta	1,187,323	1,318,267	1,311,352	90%
Akadeemiya Goboleedka Afka Soomaaliga	235,589	342,256	342,256	69%
Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	124,133,231	136,766,704	78,387,265	91%
Wasaaradda Dhallinyarada & Ciyaaraha	1,193,735	1,239,263	1,050,948	96%
Wasaaradda Qoyska & Horamarinta Xuquuqul Insaanka	1,020,814	1,149,594	1,152,684	89%
Hay'addaha Naafadda Qaranka	545,659	642,016	642,016	85%
Wadarta	\$905,202,987	\$1,079,315,784	\$1,079,315,784	84%

8.0 MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DAWLADDA

8.1 Xeerarka Xisaabeed

8.1.0 Warbixin Guud

Xarunta ugu weyn ee ay ku shaqayso xiligaan Dawladda Federaalka Soomaaliya waa magaalada Muqdisho oo isla markaana ah magaalada madaxda dalka. Hay'ada soo gudbiyey Xisaabxirkaan waxaa laga heli karaa ciwaankaan hoose oo ah:

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda
Dhismaha Wasaarada Maaliyadda
Degmada Shingaani
Muqdisho,
Soomaaliya

Hawlaha loo igmaday Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo hay'adaha hoos yimaada waxaa ka mid ah in muwaadinka Soomaliyeed ka haqabtirto adeegyada dawladeed ee ay ugu baahanyihiin si joogto ah.

Sharciyada maaliyadeed ee lagu maamulay hawlaha la xiriira maaliyadda Dawladda waxaa ka mid ah:-

1. Sharciga Qoondada Miisaaniyada ee 2024
2. Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ayaa isna la ansixiyay 2022.
3. Sharciga wax libsigu Dawladda ee (Procurement Act), 2016

December 2019 Baarlamaanka Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, sidoo kale Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ayaa isna la ansixiyay 2022. Sharciga cusub ee Maamulka Maaliyadda waxa uu beddeli doonaa Sharcigii hore ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dawladda ee 1961 ee markii danbe 1971 wax looga badalay. Sharcigaan cusub waxana uu sii adkaynayaa baahidii loo qabay in la soo saaro warbixin maaliyadeed ee uu farayay sharcigii hore ee la beddelay. Sidaas daraadeed, waxa uu farayaa in Xisaabxirka loo soo diyaariyo hab waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee xisaabaadka Dawladda sida ku cad qodobka 94^{aad} faqradiisa 2^{aad}, halka qodobka 103^{aad} ee Sharciga cusub kusii kordhinaayo faahfaahinada dheeriga ah ee loo baahanyahay in la raaciyo xisaabxirka.

8.1.1 Xeerar Xisaabeedka Dawladda

Xeerarka halkaan ku xusan waxaa loola jeedaa mabaadi'da gaarka ah, waxyaabaha lagu saleeyo aqoonsiga dhacdooyinka maaliyadeed, heshiisyada xisaabeed qawaaniinta maaliyadeed ee ay ku dhaqanto Dawladda Federaalka Soomaaliya marka la diyaarinayo lana soo bandhigayo warbixinnada maaliyadeed ee sannadlaha ah ama rubaclaha ah. Bogaga soo socda waxaa ku qoran xeerarka xisaabeed ee loo cuskaday diyaarinta xisaabxirka iyo warbixinnada maaliyadeed ee la socda. Xeer kasta oo halkaan lagu xuso waa habka saxda ah ee si joogto ah loogu isticmaalo dhacdooyinka maaliyadeed ee dalka. Qaar ka mid ah xeerarkaas hoos ayay ku xusan yihiin.

A) Xeerarka lagu saleeyay Diyaarinta Xisaabxirka

Xisaabxirka waxaa uu waafaqsanyahay shuruucda soo socota;

- Sharciga Maamulka Maaliyada Dalka ee 2019, iyo Xeeridaamiyihisa, 2022
- Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee (IPSAS) gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017).

Si waafaqsan tuduca 1^{aad} iyo qodobka 43^{aad} faqradiisa 2^{aad} ee Sharciga PFM-ka, Xisaabxirkani waxa loo soo diyaariyay hab waafaqsan dhammaan Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee la isla garanaayo ee loo yaqaano International Public Sector Accounting Standards ama (IPSAS), gaar ahaan Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017) ee uu soo saaray Dallada Caalamiga ah ee Dejinta Xeerarka xisaabeed ee Dawladaha ee (IPSASB) ee hoos yimaada Hay'adda Caalamiga ah ee Xisaabaadka ee (IFAC) sida ku cad qodobka faahfaahinta xeerarka xisaabeed ee hoos ku xusan.

Marka la dhaqangeliyo shuruucda nidaamka ku xisaabtanka lacagaha caddaanka ah keliya ee IPSAS warbixinada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah kuwan soo socda;

- ◆ Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka
- ◆ Muuqaalka isbarbardhiga Kutalagalka miisaaniyadda iyo Natiijada dhabta ah;
- ◆ Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinada la socda;

Warbixinnada aasaasiga ah ee kor ku xusan waxaa lala soo gudbiyay faahfaahino iyo macluumaad kale, oo muhiim tahay in la shaaciyo sida uu qabo Xeeridaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2022 qodobkiisa 103^{aad} faqrada 2^{aad} waxaana ka mid ah macluumaadkaas:

- ◆ Muuqaalka Maaliyadeed ee Dawladda (Balance sheet)
- ◆ Warbixinta Dakhliga iyo Kharashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda Dawladda;
- ◆ Warbixinta Deymaha kharashaadka;
- ◆ Warbixinta Deymaha Dibedda
- ◆ Warbixinta Qalabka iyo Hantida Maguurtada ah

b) Mabda'a sii joogtaynta hawlaha Dawladda (Going concern)

Xisaabxirka Dawladda waxaa loo diyaariyay hab waafaqsan mabda'a sii joogtaynta hawlaha Dawladda. Dhammaan xeerar xisaabeedka Dawladda waxaa loo dhaqan galiyay si joogto ah intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka.

c) Hay'ada warbixinta soo gudbisay

Sida uu qabo Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019 qodobkiisa 45^{aad} faqradiisa 1^{aad} ee awooda u siinaya Xisaabiyaha Guud ee Dawladdu in uu soo diyaariyo xisaabxirka. Haddaba Xisaabxirkan waxaa soo diyaariyay soona gudbiyey Xafiiska Xisaabiyaha guud ee Dawladda.

Si waafaqsan qodobka 1.4.8 ee Halbeegga Xisaabeedka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda ee lacagaha Caddaanka ah (cash basis IPSAS, 2017), Xisaabxirkani waxaa lagu

soo gudbiyay dhammaan dhacdooyinka maaliyadeed ee hay'adaha Dawlada Federaalka Soomaaliya ee ku jira miisaaniyadda Dawladda 2024. Liiska hoose waxaa ku xusan dhammaan hay'adaha Dawladda ee ku jiray qoondada miisaaniyadda ee xisaabxirkaani khuseeyo.

Hay'adda Miisaaniyadda ku jiro Sannad Maaliyadeedka 2024

Tiro Tixane ah	Hay'adaha Maamulka
1.	Xafiiska Madaxtooyada
2.	Xafiiska Golaha Shacabka
3.	Xafiiska Aqalka Sare
4.	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
5.	Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga
6.	Safaaradaha
7.	Wasaaradda Maaliyadda
8.	Xafiiska Xisaabiyaha Guud
9.	Adeega Guud ee Dowladda
10.	Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya
11.	Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha
12.	Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya
13.	Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta
14.	Hey'adda Qoxootiga iyo Barakacayaasha Qaran
15.	Hey'adda Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadwaynaha
16.	Hey'adda Maaraynta Masiibooyinka
17.	Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka
18.	Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka
19.	Ciidanka Asluubta
20.	Maxkamdda Sare
21.	Maxkamadda Gobollka Banaadir
22.	Maxkamadda Racfaanka
23.	Guddiga Adeegga Garsoorka
24.	Xeer-ilaaliyaha Guud
25.	Garyaqaanka Guud
26.	Xafiiska Hantidhowka Guud
27.	Guddiga M. Banaan Ee Xududaha & Federalka
28.	Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Heshiisiinta Qaranka
29.	Guddiga Madax Bannaan Doorashooyinka Qaranka iyo Soodimaha
30.	Guddiga Madax Bannaan Ee Dib-u-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
31.	Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda
32.	Guddiga Madax Bannaan Ee La-Dagaalanka Musuqmaasuqa
Hay'adaha Amniga	
1.	Wasaaradda Gaashaandhigga
2.	Ciidanka Xoogga Soomaaliyeed
3.	Maxkamadda Ciidamadda

4.	Hay'adda Naafada iyo Agoonta C. Qalabka Sida
5.	Wasaaradda Amniga Gudaha
6.	Ciidanka Booliska Soomaaliyeed
7.	Hey'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka
8.	Hey'adda Sodaalka iyo Jinsiyadda
Hay'adaha Dhaqaalaha	
1.	Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha
2.	Wasaaradda Batroolka & Macdanta
3.	Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed
4.	Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka
5.	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa
6.	Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah
7.	Hey'adda Cilmi Baarista Baddaha Soomaaliyeed
8.	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga
9.	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska
10.	Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada
11.	Hey'adda Isgaarsiinta Qaranka
12.	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyaynta
13.	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada
14.	Hay'adda Duulista Hawadda
15.	Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda
16.	Dekadda Xamar
17.	Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha
18.	Hey'adda Tayo Dhowrka
19.	Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada
Hay'adaha Bulshada	
1.	Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada
2.	Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare
3.	Jaamacadda Umadda
4.	Akadeemiyadda Cilmiga, Fanka iyo Suuggaanta
5.	Akadeemiya Goboleedka Afka Soomaaliga
6.	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
7.	Wasaaradda Dhallinyarada & Ciyaaraha
8.	Wasaaradda Qoyska & Horamarinta Xuquuqul Insaanka
9.	Hay'addaha Naafadda Qaranka

d) LACAGTA LAGU SALEEYAY XISAABXIRKA

Lacagta sida toos loogu diiwaangaliyo dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda waa lacagta doolarka maraykanka (USD). Waxaa loo isticmaalaa soo aruurinta dakhliga Dawladda sidoo kale waxaa lagu bixiyaa kharashaadka Dawladda. Lacagaha lagu qabtay Shilin Soomaaliga waxaa loo bedalaa (sarifaa) Doolarka Maraykanka, maadaama miisaaniyaddu ay ku salaysantahay Dollarka Maraykanka.

e) **Sannad Maaliyadeedka**

Rubaca 4^{aad} Sannad Maaliyadeedka Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ka bilowdaa 1^{da} October waxa uuna ku egyahay 31^{da} December. Hadaba rubaca ay khuseeyso xisaabxirkani waa rubaca 4^{aad} Sannad Maaliyadeedka ku eg 31-ka December 2024 oo ay barbar taalo xisaab xirkii rubacii 4^{aad} ee sannadka 2023 si la isu barbardhigo labada sanno.

f) **Aqoonsiga Dakhliga**

Dakhliga waxa uu ka koobanyahay dhammaan lacagaha soo gala Dawladda Federaalka Soomaaliya intii lagu guda jiray saddex biloodlaha afaraad ee sannadka 2024, waxa ayna usii kala baxaan, Dakhliga Cashuuraha, Dakhliyada kale iyo Deeqaha Dibedda ka yimaadda. Dakhliyadaas waxa loo aqoonsadaa dakhli ahaan markii lacagahaas dhab ahaan ugu soo gasho Khasnada Dawladda.

1. **Dakhliga Cashuuraha**

Dakhliga Dawladdu waxa uu ka kooban yahay: Dakhliga Cashuuraha, Dakhliyada kale (Khidmadaha) iyo Deeqaha dibedda. Dakhliga waxaa la aqoonsanayaa marka lagu soo xareeyo Khasnadda Dawladda (TSA)

2. **Dakhliyada kale**

Waa dakhliyada laga helo khidmadaha Dawladdu u fuliso dad waynaha ee aan cashuurta ahayn, waxaana dakhli ahaan loo aqoonsadaa markii uu dhab ahaan usoo xeroodo.

3. **Deeqaha Dibedda**

Dakhligaan waxa uu ku cad yahay heshiis ay wada galeen deeq bixiyayaasha iyo Dawladda Soomaliya ujeedka loo isticmaali doono dakhligaan ama deeq maaliyadeedka ee dawladdu ka hesho hay'ado iyo wadamo shisheeye oo ah mid dhinacya badan ah ama mid laba dhinacle ah. Dakhligaan waxaa la aqoonsadaa keliya marki uu soo galo Khasnada Dawladda.

4. Deymaha oo lagu soo gudbiyo si waafaqsan Halbeegga Xisaabeedka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda ee **lacagaha Caddaanka ah (cash basis IPSAS, 2017)**.

5. **Aqoonsiga Kharashaadka**

Kharashaadku waa lacagta ay bixiso dawladdu ama jiho kale ka bixiso Dawladda. Sidaas darteed kharashka waxaa la aqoonsan karaa laguna soo gudbin karaa xisaabxirka doowladda markii si dhab ah lacagtu uga baxdo khasnada Dawladda ee (TSA).

6. **Mushaarka Shaqaalaha**

Waa lacagaha la siiyo shaqaalaha oo iskugu jira Mushaar, Gunno iyo waxyaabo kale oo la xiriira kharashaadka shaqaalaha. Kharashkaas waxaa la aqoonsadaa kaliya markii dhab ahaan loo bixiyo.

7. Isticmaalka Agabka iyo Adeegga

Waxaa loo aqoonsadaa kharash ahaan markii adeega ama agabka dhab ahaan loo bixiyo ama loo helo. Haddii aan lagu bixin intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka, waxaa deyn ahaan loogu muujinayaa Muuqaalka Maaliyadeed ee Dawladda wadarta deymahaas iyo caddayntoodaba.

8. Hanti, Qalab iyo Hanti kale oo Ma guurto ah

Waxa ay iskugu jiraan hantidani, dhul, warshado, gawaari, qalab iyo wax kasta, oo hanti ma guurto ah ee ay dawladdu leedahay. Halbeeg Xisaabeedka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda ee lacagaha Caddaanka ah (cash basis IPSAS, 2017) marka lagu dhaqmayo, markasta la soo iibsado qalabkaas kor ku xusan waxaa loo aqoonsadaa kharashaad baxay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka. Sidaas ay tahay haddana waxa ay dawladdu leedahay diiwaan lagu diiwaan geliyo dhammaan wixii hanti ma guurto ah.

9. Kaalmo Arrimo Bulsho.

Sida uu qabo hishiiska IDA ee uu maalgeliyo Bangiga Aduunka, lacag kaalmo arrimo bulsho ah ayaa la bixiyay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka iyadoo ujeedadu ahayd; in la siiyo qoysaska dhaqaale ahaan jilicsan lacago caddaan ah, sidoo kale in la dhiso hab qaran oo looga gaashaaman karo loogana soo kaban karo aafuoyinki ay sababeen musiibooyinka dalka ka jira.

10. Kaalmo dhaqaale (subsidy).

Mashruuca SCALED-UP ayaa laga bixiyay lacag kaalmo dhaqaale ahaa oo lagu helay hishiiska IDA ee uu maalgaliyo Bangiga Aduunka si kor loogu qaado helitaanka dadweynaha adeegyada ay bixiso dawladdu iyada oo si gooni ah loo abaarayo ganacsatada yaryar, shaqaalaysiinta dhalinyarada gaar ahaan dumarka.

Dhammaan lacagaha kaalmada dhaqaalaha ah waxaa la aqoonsadaa marka lacagaha dhab ahaan loo bixiyo.

11. Lacagaha caddaanka ah iyo waxyaabaha la midka ah lacag cadaan ah

Lacagta kaashka ah ama caddaanka ah iyo waxyaabaha kaashka u dhigma waxaa lagu soo bandhigayaa muuqaalka caddaynta maaliyadeed ee Dawladda ee loo yaqaano (Balance Sheet). Sidoo kale waxaa lagu soo bandhigaa Muuqaalka Qulqulka Kaashka (cashflow statement) waxa ayna ka kooban yihiin kaashka caddaanka ah (Cash on Hand) iyo dibaajiyada si fudud loogu beddeli karo kaash markii loo baahdo iyo sidoo kale hormariska bangiga (Advances) si loogu maareeyo baahiyaha lacageed ee Dawladda.

Waxaa sidoo kale ku jira dhammaan haraayada kaashka ah iyo haraayada xisaab bangiyeedyada Dawladda iyo kuwa mashaariicda ee hoos yimaada Khasnada Midaysan ee Dawladda ee ka furan Bangiga Dhexe ee Soomaalia.

12. Lacagaha Xaniban

Lacagaha xaniban waxaa loola jeedaa lacagaha aan loo isticmaali karin in la iskaga bixiyo deymo ama aan loo isticmaali karin wax kale ugu yaraan muddo 12 bilood ah. Lacagaha ku

jira Sanduuqa Buffer Fund-ka keliya waxaa loo isticmaali karaa in lagu bixiyo xaaladaha lacag yaridu timaado keliya. Lacagaha laga isticmaalo lama dhaafin karo xadka ku jira miisaanyada uu ansixiyay Baarlamaanku. Lacagaha laga bixiyo Sanduuqa Buffer fund-ka kaliya waxaa loo wareejin karaa miisaaniyada Dawladda kaliya.

13. Isbarbardhiga ku talagalkii hore ee miisaaniyada iyo Natiijada Dhabta ah

Si la mid ah xisaabxirka Dawladda, miisaaniyad sannadeedka Dawladda waxay ku salaysan tahay nidaamka xeer xisaabeedka (cash basis), miisaaniyaddu waxay raacdaa habka kala sooca mucaamalaadka “classification” ee uu farayo (GFS, 2014 economic classification), waxa ayna sidoo kale khusaysaa saddex biloodlaha koowaad ilaa saddex biloodka afaraad oo ka bilowday 1^{da} Janaayo 2024 kuna eg 31 Dec 2024.

14. Dhacdooyinka maaliyadeed ee lacagaha qalaad

Dhammaan lacagaha qalaad ee soo gala khasnada Dawladda waa in loo beddelaa doolarka Maraykanka iyada oo la isticmaalayo sicirka sarifka ee maalintaas uu marayo. Sidoo kale lacagaha qalaad ee haraaga ku ah Khasnada Dawladda waa in loo badalaa lacagta doolarka iyada oo la isticmaalayo sicirka sarifka ee dhammaadka sannadka. Isbadalka ku dhaca sicirka sarifka kororsiimo ama hoos u dhac waa in lagu buuxiyaa farqiga u dhexeeya haraaga bilowga sannadka iyo haraaga dhammaadka sannadka. Sidaas oo ay tahay hadana xiliyadan lagu jiro ma dhacdo lacago qalaad oo soo gala xisaabta Dawladda oo aan ahayn doolarka.

15. Sicirka Sarifka Lacagaha Qalaad

Maadaama lacagta loo isticmaalo dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda ay tahay lacagta doolarka maraykanka, dhammaan xogta maaliyadeed ee ku xusan xisaabxirkaan waa in lagu soo bandhigaa doolar Maraykanka USD. Sidaas darteed, dhammaan xogta maaliyadeed ee ku xusan xisaab-xirka saddex biloodlaha koowaad ee sannadka 2024 waxaa lagu saleeyay Doolarka Maraykanka USD.

Lacagta	2024 USD\$	2023 USD\$
Shillin Soomaali (SOS)	22,500	22,500

16. Kharash aan la hubin

Deymaha aan la hubin in lagu yeelan doono Dawlada, ama dacwad maxkamadeed ay ku socoto, si gooni ah ayaa loo diiwaan geliyaa sidoo kale xisaabxirka sannad maaliyadeedka ayaa lagu shaacinayaa hadii saadaashu u egtahay in kharash bixin ay suurto gal tahay. Hantida sidaas oo kale aan la hubin, lama shaaciydo lamana aqoonsado.

17. Balan-qaad kharash bixin (Commitments)

Sida ku cad Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee soo baxay 2019-kii, waxa waajib ah in la bixiyo kharash haddii jiho kale (ganacsade) loo balan qaado in la siinayo wixii kharash ah oo laga qabo haddii uu adeeg ama agab ka iibiyo hay'ad Dawladeed.

18. Daymaha kharashaadka

Daymaha Kharashaadka waa qayb ka mid ah deymaha Dawladda ee aan weli la bixin. Deymaha kharashaadka ee la soo hubiyay sax ahaanshiyahooda waxaa lagu soo bandhigay Muuqaalka Maaliyadeed ee Dawladda.

19. Lacagaha ay bixiyeen Hay'ado Kale

Dawladda Federaalka Soomaliya waxa ay mararka qaar heshaa agab iyo adeeg ay kharashkooda bixiyaan hay'ado kale ee aan Dawladda ahayn. Marka lacagahaas la bixinayo codsiga lacag bixinta waxaa la soo mariyaa diiwaanka maaliyadeed ee Dawladda isla codsigaas ayay deeq bixiyeyaashu toos u siyaan lacagtaas cidii loo amray in la siiyo tusaale ganacsade adeeg bixiye ah ama qof la taliye ah mushaarkiisa i.w.m.

Lacagaha sida tooska ah loo siiyo hay'adahaas ama adeeg bixiyayaasha aan ku jirin diiwaanka Dawladda looma aqoonsado dakhli soo galay Dawladda balse waxaa lagu shaaciyaa xisaabxirka keliya markii si dhab ah loo xaqiijin karo tirada lacageed ama adeega u dhigma ee Dawladda la siiyay. Ma jirin wax lacag toos loo bixiyay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2023.

9 FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAABXIRKA

1. Dakhliga Canshuuraha

Dakhliga canshuuraha waxaa loo aqoonsadaa qaab toos ah iyo si dadban. Waxaa ka muuqda shaxda hoose faahfaahinta dakhliga canshuuraha ee Dawladda soo galay saddex biloodlaha 4aad ee sanadaha 2024 iyo 2023. Sidoo kale shaxda waxey soo badhigaysaa koroka iyo naaquska canshuurta ee labada sano.

Canshurta	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023	Koror/ Naaqus %
	USD\$	USD\$	
Canshuurta Mushaarka Shaqaalaha Dawladda	2,989,096	2,968,611	1%
Canshuurta Mushaarka Shaqaalaha Gaarka ah	4,513,800	3,416,740	32%
Canshuurta Dakhliga Shakhsi ahaaneed Ee Dakhliga Hantida	1,815,423	279,996	548%
Canshuurta Faaiidada Shirkadaha	227,133	571,149	-60%
Canshuuraha libka - Hoteellada	501,568	511,315	-2%
Canshuuraha libka - Isgaarsiinta	1,449,370	-	0%
Canshuuraha libka - Shirkadaha Qalabka Korontada Iyo Korontada	460,775	55,000	738%
Canshuuraha libka - Tigidhada Diyaaradda	1,479,291	1,522,620	-3%
Canshuuraha libka - Shirkadaha Adeegga Tv-Yada	-	1,614	-100%
Canshuuraha libka - Warshadaha Yaryar	1,536	-	0%
Canshuuraha libka - Farmashiyaha	-	1,390	-100%
Canshuuraha libka - Canshuuraha Kale Ee libka	3,851,666	221,342	1640%
Canshuuraha libka - Alaabta Kale Ee Dibadda Laga Keeno	7,556,684	6,781,454	11%
Canshuurta Macaashka	-	-	0%
Canshuurta - Cabitaanada Fudud	-	3,466	-100%
Canshuurta - Dharka Iyo Dharka	-	-	0%
Canshuurta - Korontada Iyo Qalabka Elektarooniga ah	-	-	0%
Canshuurta - Isticmaalka Waddo Marista (Tremistrale)	739,889	442,188	67%
Canshuurta - Ururinta Nootayada	358,184	891,281	-60%
Canshuurta Quutul-Daruuriga	14,361,951	12,980,739	11%
Canshuurta Qalabka Dhismaha	6,447,498	6,261,509	3%
Canshuurta Korontada Iyo Elektarooniga	2,199,398	2,549,735	-14%
Canshuurta Baabuur Iyo Qalab Dayactirla	1,736,054	2,017,497	-14%
Canshuurta Waxyaabaha La Isku Qurxiyo iyo Uduga	428,477	367,424	17%
Canshuurta Qaadka	4,417,686	4,370,184	1%
Canshuurta Alaabta Sigaarka Iyo Tubaakada	892,851	828,787	8%
Canshuurta Shidaalka Iyo Oolyada	7,497,442	5,141,522	46%
Canshuurta Dharka Iyo Kabaha	3,323,932	2,859,348	16%
Canshuurta Saabuunta	873,962	837,050	4%
Canshuurta Alaabooyinka Caagagga ah Iyo Kuwa Caagga Laga Sameeyo	255,065	255,733	0%
Canshuurta Alaabaha Kale Ee Soo Dejinta	48,991	60,801	-19%
Canshuurta Dahabka	-	3,108	-100%
Canshuurta - Agabka guryaha lagu Istmcaalo	2,896,916	2,948,918	-2%
Canshuurta Dawada & Qalabka Caafimaadka	692,676	614,692	13%
Canshuurta Agab Xafiiseed	146,503	103,663	41%
Canshuurta Wax Soo Saarka Xoolaha	49,579	21,644	129%
Canshuurta Wax Soo Saarka Beeraha	104,712	85,350	23%

Canshuurta Cuntadda Badda	8,693	13,668	-36%
Canshuurta Beey'Ada Iyo Xabagta	9,440	4,266	121%
Canshuurta Alaabaha Kale Ee Dhoofinta	180,055	152,399	18%
Canshuurta Farankaboolada Furdooyinka	974,875	895,762	9%
Canshuurta Badqabka Baabuurta - Galawito	48,571	91,542	-47%
Farankaboolada Qaansheegyada Iyo Qandaraasyada	2,118,240	884,414	140%
Canshuurta Shaabada Alaabta Cuntada	84,910	128,188	-34%
Wadarta	\$75,742,894	\$62,146,108	22%

2. Dakhliyada kale - Khidmadaha

Dakhliyada kale ama dakhliga aan canshuuraha ahayn waa dakhliga ay dawladdu ka hesho adeegyada ay bixiso oo aan ahayn canshuur. Waxaa ka muuqda shaxda hoose faahfaahinta dakhliga ka soo xarooday adeegyada ay bixisay Dawladda saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023.

Dakhliyada Kale	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023	Koror/ Naaqus%
	USD\$	USD\$	%
Kireyta Kheyraadka Dhulka	-	2,674,732	-100%
Kireynta Dhulka Iyo Dhismoooyinka	224,766	190,626	18%
Khidmada Fiisaha	1,619,742	2,562,266	-37%
Khidmada Baasaboorka	2,984,241	2,264,477	32%
Canshuurta Ogolaanshaha Shaqada	737,029	596,447	24%
Khidmadda Garoonka	1,012,123	918,007	10%
Khidmadda Duulimaadka (Iata)	5,204,605	6,532,496	-20%
Shatiyada Ganacsiga Iyo Shaqada	276,139	360,410	-23%
Shatiyada Raadiyaha Iyo Tv-Ga	1,200	3,300	-64%
Khidmada Diiwaangelinta Ngo-Yada Gudaha	113,582	101,500	12%
Khidmada Diiwaangelinta Shirkadaha Gudaha	63,000	71,500	-12%
Khidmada Beeraha	16,590	9,480	75%
Khidmada Adeegga	126,700	194,395	-35%
Khidmada Shatiga Kalluumeysiga	326,000	3,000	10767%
Khidmada Shatiga Wadidda Gawaarida	216,101	119,105	81%
Khidmada Diiwaangelinta Taargada	542,340	444,327	22%
Khidmada Aqoonsiga Shaqsiga	14,430	72,590	-80%
Khidmada Adeegyada Waxbarashada	81,965	53,285	54%
Khidmada Shirkadda Amniga	15,310	30,470	-50%
Khidmada Isgaarsiinta	384,557	5,272,963	-93%
Khidmada Shatiyada Kale	2,390	28,850	-92%
Khidmada Diiwaangelinta Doorashada	270,000	-	0%
Khidmada Warqadda Dembi La Aanta	231,320	208,110	11%
Khidmada Galka Xareynta Codsiga Maxkamadda	209,391	234,439	-11%
Khidmadda Dekedda - Albayrak	8,161,043	9,378,032	-13%
Khidmada Dekedda - Furdada	1,956,059	1,806,767	8%
Khidmadda Rakaabka Diyaaradaha	585,818	503,936	16%
Khidmada Bedqabka Xamuulka	9,586	9,178	4%
Khidmadda Diiwangelinta Maraakiibta iyo Diyaaradaha (Prtnz/Arvo)	260,950	267,410	-2%
Ciqaabaha	315,619	62,178	408%
Wadarta	\$25,962,594	\$34,974,273	-26%

3. Deeqaha Dibedda

Heshiisyada maaliyadeed ee laba dhinac ah iyo kuwa dhinacyo badanta ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya ay la gasho dawladdaha saaxiibka la ah ayaa lagu caddeeyaa ujeedooyinka loo isticmaali doono deeqaha laga helo hay'adahaas. Deeqaha la helo maahan kuwo dib loo celin doono. Dakhliga deeqaha ah ee ku xusan xisaabxirka waxaa la diiwaan galiyay markii lacag cadaan ahaan loo helo oo lagu shubay Khasnada Dhexe ee Dawladda. Guud ahaan deeqaha la helay intii lagu guda jiray saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023-ka waxay ka muuqdan faahfaahintooda shaxdaan hoose.

Deeqaha Dibeda	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Deeqaha la helay intii lgu guda jiray Sanadka		
Deeqo Laba Dhinacle ah		
Dowladda Turkiga	-	7,500,000
Dowladda China	-	-
Dowlada Imaaraadka	2,768,685	-
Wadarta deeqaha laba dhinacle ah	2,768,685	7,500,000
Deeqo Dhinacya Badan ah		
Bangiga Addunka	166,198,020	196,553,018
Bangiga Hormarinta Afrika	3,304,900	4,358,535
Midowga Yurub (EU)	148,770	-
Global Partnership for Education	-	274,138
OPEC	3,030,000	
Wadarta Deeqaha dhinacya badanta ah	172,681,689	201,185,692
Wadarta Deeqaha Dibedda	\$175,450,374	\$208,685,692

4. Mushaarka Shaqaalaha

Mushaarka shaqaalaha oo ah dhammaan mushaaraadka ay shaqaalaha dawladdu bixiso, ciidamda, shaqaalaha rayidka, siyaasiyiinta waxay faahfaahintooda ka muuqata shaxdaan hoose.

Mushaarka Shaqaalaha	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Mushaarka - Lacag Cadaan ah	50,189,933	45,615,059
Gunnooyin Lacag Cadaan ah	33,295,600	32,388,839
Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	10,641,227	8,955,965
Wadarta	\$94,126,760	\$86,959,863

Kharashaadka kale ee shaqaalaha waxaa uu ka kooban yahay mushaarka shaqaalaha Mashruucii kor u qaadista aqoonta shaqaalaha ee CIM-ka, ee dhamaaday ayaa la soo wareegtay dawladdu Gunnooyinka dhiirigelinta shaqaalaha mushaarka macalamiinta Wasaraada Waxbarshadda.

5. Isticmaalka Agabka iyo Adeega

Kharashaadka ku baxay Isticmaalka Agabka iyo Adeega saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023 waxa ay kala ahaayeen faahfaahintooda sida ka muuqato shaxdaan hoose.

Isticmaalka Agabka iyo Adeega	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Kharashka Safarka iyo Shirarka	6,955,922	5,750,050
Hawlaha Guud	2,156,264	1,717,267
Isgaarsiinta	397,057	278,346
Shidaalka iyo Saliidaha	3,012,787	2,322,063
Agabka iyo Alaabaha	10,190,711	1,902,447
Dayactir iyo Hagaajin	1,202,454	548,658
Kirooyin	1,971,315	803,743
Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	1,519,202	576,985
Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	31,662,110	18,484,807
Adeegyadda Bangiga	3,181,348	2,381,868
Xayeysiinta iyo Heshiis Wax kala Iibsi	412,764	187,695
Caymiska Dadka Guud	87,687	3,040,880
Booliska - Agabka iyo Adeegyada	240,000	60,000
Nabad-Sugidda - Agabka iyo Adeegyada	936,694	1,487,177
Xoogga- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	640,000	360,000
Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	15,512,496	11,778,362
Wadarta	\$80,078,813	\$51,680,348

6. Kharashaad Raasumaal – Soo iibsashada Hantida Maguurtada ah

Dhammaan kharashka ku baxay soo iibsasho hanti ama qalab ah waxaa lagu daraa kharashaadka la bixiyey. Qiimaha ku baxay soo iibsasho qalab ama hanti ma guurto ah saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023 waxay ka muuqataa faah-faahintooda shaxdaan hoose.

Kharashaad Raasumaalka	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	128,974
Qalabka iyo Mashiinadda	12,018,666	2,350,937
Hantida kale ee Maguurtada ah	4,091,962	911,339
Nidaamyada Hubka	305,000	-
Wadarta	\$ 16,415,628	\$ 3,262,276

7. Deeq Dawladu Bixisay

Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa bixisay deeqaha ka muuqda shaxdaan hoose, iyadoo lagu faah-faahin doono dawlad goboleedyada la siiyey saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023.

Deeq Dowladu Bixisay	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Deeq la siiyey Dowladu Shisheeye		
Kharash ka mid noqosho Hay'ado Caalami ah	17,015,721	31,758,461
Deeqo loo diray Maamul Goboleedyada iyo Dowladda Hoose iyo Hay'ado kale	-	-
Bangiga Horumarinta Soomaaliya	224,496	203,088
Rugta Ganacsiga Soomali	224,496	203,088
Dawladd Goboleedka Somaliland	-	
Dawladd Goboleedka Puntland	9,376,281	2,225,015
Dawladd Goboleedka Jubbaland	4,275,692	6,087,479
Dawladd Goboleedka Koofur-galbeed	11,469,019	4,505,024
Dawladd Goboleedka Galmudug	8,667,253	3,185,239
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle	8,140,867	3,014,597
Maamulka Gobolka Benadir iyo Dowladda Hoose ee Muqdishu	14,148,720	7,076,219
Wadarta Deeqaha	\$73,542,546	\$ 58,258,209

Deeqaha la siiyey Maamul Goboleedyada xubanaha ka ah Dowladda Federaalka waxaa loogu tala galay in lagu kabo miisaaniyadooda waxaana u ansixiyey in loo wareejiyo labada aqal ee Baarlamanaaka Soomaliya.

Kharashka ka mid noqosho Hay'adaha Caalamiga ah waxaa ka mid ah kharshaad sida qaraanka ka mid noqoshadda (Membership fee) Qaramada midoobay, kharashaad caafimaad loogu sameeyey gobolada dalka ayna fuliyeen hay'ado calami ah & qaaraanka ururada kale ee caalamiga ah ee hay'adda kala duwaan ee Dowladda ka tirsan yihiin.

8. Kharashaadka Dulsaarka Daymaha

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqdo dulsaarka daymaha ee labixiyey saddex biloodlaha 4^{aad} sanadaha 2024 iyo 2023.

Kharashaadka Bixinta Dulsaarka Daymaha	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Dulsaarka Daymaha	4,605,227	240,125
Wadarta Adeegga Dulsaarka	\$ 4,605,227	\$ 240,125

9. Kharashaadka Kaalmo Dhaqaale

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqda kharashaadka ku baxay kaalmo dhaqaalo oo lagu dhiirigalinaayo shirkadaha ganacsiga yar yar. Saddex biloodlaha 4^{aad} ee sannadka 2024 waxaa la bixiyey kharash ka badan kharashadii la bixiyey sannadka 2023.

Kharashaadka Kabka Dhaqaale (subsidies)	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Kaalmo shirkadaha Gaarka loo leeyahay (To non-financial private enterprises)	3,742,833	571,069
Wadarta	\$3,742,833	\$571,069

10. Kharashaadka Kaalmo Bulsho

Kharashaadka ka muuqda shaxda hoose waa kharashaad la siiyo bushada nugul oo lacag caddan ah ama wax u dhigma la siiyo. Waxaana laga bixiyaa kharashaadkaan maashaariicda Bangiga Addunka.

Kharashaadka Arrimaha Bulshad	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag Cadaan ah	56,604,043	78,710,424
Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag ahayn	-	5,514,582
Gargaarka Bulshadda - Lacag ahaan	-	-
Gargaarka Bulshadda - Lacag ahayn	5,500,000	26,000,000
Wadarta Kaalmada Bulsho	\$ 62,104,043	\$ 110,225,006

11. Dib-u-bixin Deymo

Dib u bixinta daymaha ee saddex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023. Waxaana la siiyey daymahaas Bangiga Adduunka. Rubaca 4^{aad} ee sannadka 2024 lama bixin dayn.

Faahfaahinada	Oct-Dec 2024	Oct-Dec 2023
	USD\$	USD\$
Dib u bixin Deymaha	-	3,226,861
Wadarta Deymaha la bixiyey	-	\$ 3,226,861

12. Lacagta cadaanka ah iyo Waxyaabaha u dhigma lacag cadaan ah

Lacagaha kaashka ah waxay ka koobanyihiin haraaga xisaabaadka Dawladda (Khasnada TSA) ku haray xisaabaadka Bangiga Dhexe dhamaadka addex biloodlaha 4^{aad} ee sanadaha 2024 iyo 2023, haraaga xisaabaadka hay'adaha dawladda ee hoos yimaada Khasnada Dhexe (TSA) iyo haraaga akoonada mashaariicda, iyo Hay'adaha Dawladda dhamaadka sannad maaliyadeedka 2024.

Magaca Xisaabta	USD\$	USD\$
	2024	2023
Government Main Account	\$10,219,060	\$5,771,018
African Development Bank	\$0	\$0
RCRF Phase 2 Regions	\$0	\$0
PFM Phase 2 Scale-Up	\$0	\$0
Capacity Injection Project	(\$0)	\$0
ICT Phase 2	\$0	\$0
SFF-LD UN Bank A/c	\$0	\$211,505
SFF-LD WB Bank A/c	\$104	\$104
ICT Phase 2 (Puntland)	\$0	\$0
SCORE Project	\$0	\$0
RCRF WB Surge Support	\$0	\$0
African Development Bank Phase II	\$1	\$1
Somalia Urban Resilience Project	\$0	\$0
Somali Petroleum Technical Assistance Project	\$5	\$5
Support to Stabilization project PH 2	\$0	\$0
Education Sector Program Implementation Grant (ESPIG)	\$1,700,258	\$0
SEAP Project	\$1	\$1
SUIPP-AF PROJECT	\$0	\$0
SIEPMID PROJECT	\$321	\$394
European Union - Budget Support	\$0	\$0
Saudi Arabia	\$0	\$0
Qatar	\$0	\$0
SCALED-UP	\$89,167	\$116,914
GARGAARA Co. LTD	\$276,796	\$3,979,748
Civil Aviation external	(\$0)	\$0
Road Infrastructure Programme (ADF Grant)	\$14,372	\$14,372
Road Infrastructure Programme (TSF Grant)	\$0	\$0
Shock Responsive Safety Net for Human Capital	\$152,849	\$331,316
SCAA	\$0	\$1,021
Fishing Revenue	\$309,290	\$0
Water For Agro-Pastoral Productivity and Resilience (Biyoole) - B	\$0	\$0
Water For Agro-Pastoral Productivity and Resilience (Biyoole) - A	\$0	\$0
DPO	\$49,770,769	\$18,315,662
Buffer Acc.	\$0	\$0

Somalia Crisis Recovery Project-DA-A	\$11,703,330	\$14,574,763
SISEPCB Project	\$413,568	\$349,124
Somali Urban Resilience Proj- Ph-2	\$220,870	\$530,459
TSF - Crisis Response Programme For National And Regional Mitigation Of Covid-19 Impact	\$4,505	\$4,505
ADF - Crisis Response Programme For National And Regional Mitigation Of Covid-19 Impact	\$18,298	\$18,298
Somalia Shock Responsive safety net for locust responsive project (SNLRP)	\$0	\$62,138
SURP PHASE II FMS	\$546,295	\$417,118
RCRF Phase III - DA-A	\$1,929,000	\$1,443,774
RCRF Phase III - DA-B	\$168,587	\$407,035
La Falgelidda Covid-19	\$0	\$0
TA Regulatory Authority Energy Sector	\$7,808	\$1,773
SDR	\$113,909	\$113,909
DEVELOPMENT POLICY OPERATIONS - DPO- INTERNAL	\$5,000,000	\$5,000,000
Special Emergency Assistance Fund for D & F	\$6,016	\$6,016
GOV. INTERNAL USD-SDR TEMPORARY	\$169,742	\$169,742
MoF Turkey Budget Support	\$0	\$7,387,500
UAE-Grants	\$0	\$1,920,098
Road Infrastructure Programme (EU-PAGODA)	\$54,128	\$131,913
Performance Based Fund	\$50,165	\$0
Somalia Electricity Sector Reco Pro	\$36,376	\$443,012
EU-Budget Internal Account	\$0	\$1,352,996
Resilience for Food & Nutr Secu HOA - ADF	\$50,051	\$8,153
Resilience for Food & Nutr Secu HOA - TSF	\$914	\$28,314
Strengthening Public Management & DMP	\$20,255	\$116,909
Somalia Edu for Hum Capi Dev SEHCD	\$678,382	\$810,700
Damal Cafimaad FGS-DA-A	\$372,483	\$2,224
Statistics Deve Support Project Som	\$281,850	\$148,369
Sagal Project	\$73	\$270,286
Drive Project	\$475,769	\$610,200
Somalia Edu for Hum Capi Dev B	\$3,258,654	\$2,235,220
Petroleum Revenue	\$0	\$2,634,611
Ground Water for Resilience-A	\$477,497	\$74,272
Petty Cash	\$0	\$0
Travel advance	\$0	\$0
MDA Advance	\$0	\$0
Damal Caafimaad FMS-DA-B	\$88,106	\$150,488
SWRR-FGS A	\$740,030	\$455,141
COVID19 Emergency Vaccine Project FGS(D -A)	\$49,628	\$397,852
SWRR-FMS B	\$2,172,089	\$2,952,535
Additional Financing Resilience for F & Nutr Sec HoA-TSF	\$98,921	\$98,921
Eastern Africa Regional Digital Integration Project (EA-RDIP)	\$2,318,341	\$131,666

Gound Water for Resilience-B	\$96,335	\$92,485
National Communication Agency (NCA)	\$330,636	\$4,995,112
Rajo Kaaba	\$1,917,556	\$985,000
SOMALIAHORN OF AFRICA INFRASTRUCTURE INTEGRATION (SHIP)	\$1,527,168	\$2,610,529
Food System Resilience Program For E and S African DA-A FGS	\$1,371,253	\$4,235,062
Food System Resilience Program For E and S African (B)DA-B FGS	\$946,384	\$9,850,000
SEIP Project Fund	\$147,980	\$2,781
SEIP Project TSF Fund	\$77,688	\$54,404
SOMALI SUSTAINABLE FISHERIES DEVELOPMENT PROJECT	\$1,308	\$288,395
SETS Project	\$50	\$50
Somalia Enhancing Public Resource Management Project	\$279,179	\$819,410
Somali Disaster and Humanitarian Management Agency	\$0	\$0
Education Performance Based Conditions (PBG)	\$0	\$622,086
United Arab Emirates-Budget Support (CXDS)	\$0	\$0
Somalia Enhancing Public Resource Management Project	\$1,374,417	\$0
ISEGP-ADF	\$218,002	\$0
ISEGP-TSF	\$141,824	\$0
Food System Resilience Program For ABDS Africa 3	\$2,891	\$0
HAREACT PROJECT	\$147,158	\$0
LUUK-DOLLOW ROAD-ADF	\$45,024	\$0
OPEC DEVELOPMENT FUND	\$2,984,550	\$0
ACCELERATING SUST & CLEAN ENERGY ACCESS TRANSF PRO	\$438,595	\$0
financial Sector Development Project TSF (FSDPTSF)	\$99,485	\$0
financial Sector Development Project TSF (FSDP-ADF)	\$64,025	\$0
Haraaga 31^{da} December 2024	\$ 106,270,139	\$ 98,757,409

Shaxda kore waxa ku jirta haraa dhan US\$ **37,153,432** oo ah haraaga saddex biloodlaha 4'aad ee sannadka 2024 iyo US\$ **50,066,619** ee haraagaa saddex biloodlaha 4'aad ee sannadka 2023 waaba haraa aan loo isticmaali karin howl ka baxsan wixii loo qorsheeyey oo lagula heshiiyey hay'adaha bixiya mashaariicda. Haraaga ka dheeriga ah lacagta kor ku xusan waxay dawladda u isticmaali kartaa sida ay qorshaysato.

DHAMAAD